# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad fadhigii 6aad*

***Wakhtiga uu Furma:-*** *09:47 AM*
***Taariikhda: - Axad 03 August 2025***

**Gudoonka: -** Mudane, Siciid Mire Faarax (Giire)

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Xaalada G. Bariga iyo Faragalinta Maamulka Soomaaliya uu ka wado Laascaanood ee Sool bari.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** (3mnt, 30sec):- Bismilahi Raxmani Raxiim, waad mahadsantahay Gudoomiye, mudanayaasha shaqaalaha saxaafada dhamaan Asalaamu calaykum.

Gudoomiye sida ka cad Ajendaheena maanta waxa weeyaan xaalada guud ee dalka khaasatan Gobolada bariga ama Laascaanood oo ay inagu hayso faragalin dawlada Soomaaliya; Gobolo kamida Somaliland la soo faragaliyay laga sameynayo maamulo macmal ah.

Waxaan odhan lahaa Gudoomiye arintaasi waa arin qalad ah, Dalka JSL wuxuu leeyahay Dastuur iyo sharci ku cadyahiin xuduudaha qaranka Somaliland, arintaa waxa shalay ka yeeshay fadhi xukuumada ama golaha wasiirada oo madaxweynahu hogaaminayo; baaq siyaasadeed bay direen runtii waxaanan jeclahay anigu ama aan taagerayaa baaqaa xukuumada ay dirtay.

Sool iyo Sanaag Bariba waxa ay ka tirsan yahiin Somaliland sida ku cad dastuurkeena jamhuuriyada Somaliland mana qabo in aynu ku wajhno awood ciidan ama xoog oo dad reer Somaliland ah la laayo ama dhiig sokeeye aynu daadino waxaan odhan lahaa runtii aynu dirno baaq qaran in xukuumada Soomaaliya ee faashilka ah ay faragalin ku hayso dalkeenii Somaliland qaybo kamid ah runtii arintaasi waxa weeyaan xad gudub beesha caalamkana waanu u sheegaynaa arintaasi inay tahay xad gudub lagu soo sameynayo Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

Maaha in la iska indho tiro xaqa ay Somaliland u leedahay inay hesho territory ama xuduudaheedii 1960-kii; waxa ay ku taagantahayna waa sharci iyo dastuur.

Haddii la doonayo in la burburiyo xuduudo dee waxa jira dad reer Somaliland ah oo kilalka shanaad hoos taga, hadaynu nidhaahno waa Somaliland ama Gaashamo waa Somaliland dee waa qalad taasina waxay ka dhigantahay tan maanta ka socota laascaanood iyo goboladaa bariga waxaanu leenahay waa reer Somaliland mana doonayno in la faragaliyo waananu ka soo hor jeedaa faragalintooda waxaananu leenahay beesha caalamnka wixii ka yimaada arintaa ee dhibaaato ah waxa ka masuul ah xukuumada Soomaaliya ee faashilka ah ee lagu ilaaliyo villa Soomaaliya.

Waxaanu leenahay mudanayaal in aynu dirno baaq caalamiya oo aynu ugu sheegayno beesha caalamka inagoo ku taageryna baaqii xukuumada ee ay shalay soo saartay in arintaasi laga daayo Somaliland farogelinta lagu hayo cawaaqibka ka yimaadana iyagu ay masuuul ka yahiin.

Intaas baan ku soo koobi lahaa Gudoomiye xaalada bariga kolay xaalad kale oo guudina way iska jirtaa oo dalka, Abaarii waxa aynu u saarnay gudi iyagaynu ka war sugaynaa Insha Allahu tacalaa, ta labaad ee maanta jirtaa waa xaaladaa inagu soo kordhay ee la go'gaynayo goboladii Somaliland loo soo badheedhay; aad iyo aad baa u mahadsantahiin wa salaamu calaykum.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cawaale** {2mnt, 30sec}:- Bismilahi Raxmani Raxiim, shir gudoonka, mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxaafada dhamaan Asalaamu calaykum.

Salaam ka bacdi waxaan u arkaa inuu runtii qodobkani qodob aad iyo aad u muhiima yahay arinkan aynu maanta ka hadlaynaana maaha arin imika bilaabmay waa arin sadexdii sano ee u danbeyay soo socday dawlada hadda jirta markay mucaaridka ahayd waxay ahaayeen kuwii ugu weynaa ee ka soo horjeeday difaaca qaranka lagu difaacayo wakhtigaa ee hadd iyo jeer difaaca qaranka ka soo horjeeday bay ahayeen, maantana baaqyadey soo saartay qaar macno badan sameyna maaha waa baaqyo aad iyo aad u weyd ah waxaa loo baahanyahay baaqa dawlada ka soo baxayaa iyadaa maanta ka masuul ah ilaalinta xaduudaha difaaca qaranka in beesha caalamka iyo canbaarayn iyo waxaa lagu meeraysto maaha Dalka waa inoo diyaar garoobaa difaaciisa, markaa wixii booran hadimo ha qodin hadaad qodidna ha dheerayn difaacay shalayto ku jirtay markii laascanood la difaacayay ka difaacaysay maanta iyada xukuumadan buu haystaa waxaana loo baahan yahay jawaab sax ah inay ka bixiso canbaarayn arinkani kuma xalismayo baaq international communities ah kuma xalismayo wuxuu ku xalismayaa in aynu dalkeena difaacano, inay abaabusho sidii dalkan loo difaaci lahaa baa looga fadhiyaaye loogama fadhiyo canbaarayn iyo wax lamid ah.

Markaa waxaan odhan lahaa waa weyd waxyaabahan ka soo baxay xukuumada markaa waxaynu u baahanahay haddii aynu golaha nahay horena halkan baan uga sheegay resolution baynu soo saarnay in wadahadaldii Somaliland iyo Soomaaliya la joojiyo

haddana waxaan maalintii dhaweyd soo jeediyay in xeer laga soo saaro oo ay xeer noqoto inaga iyo Golahan kalee Guurtuba aynu xeer ka samayno inaanaynaan dib damaysa Soomaaliya loogala hadlin arinteeda.

Imikana waxaan aaminsanahay oo taladaydu ay tahay number one hadaynu inagu nahay Golaha Wakiilada iyo Guurti-da inaynu xeerkii soo celino oo dhamaanba la joojiyo wadadaladii aynu la lahayn in gabi ahaanba la joojiyo. Taladaydu waa taa taladayda labaadna waxa weeye difaaca qaranku xukuumada ayuu saaran yahay waa inay jawaab tan ka daran naga siisaa, wasalaamu calykum.

**Md. Siciid Jaamac Xasan** {4mnt, 20sec}:- Bismilahi Raxaamani Raxiim, shir-gudoonka, xildhibaanada, shaqalaaha iyo saxaafada Asalaamu calaykum; gudoomiye aad baad u mahadsantahay maanta waxaynu ka hadlaynaa xaalada dalka gaar ahaan xaaladaha ka soo kordhay bariga waynu ogsoonahay in inmudo ahba dawlada taagta daran ee Soomaaliya ee xasan gurguurte uu hor joogaha ka yahay markii uu ku fashilmay siyaasadiisii ee Soomaaliya inuu foosto inagu soo riixay oo uu Somaliland ka doonayo inuu siduu u soo noqon lahaa mar labaadka sidaa darteed wuxuu isku dayayaa inuu khal khal galiyo Somaliland, Somaliland waa dal jiray ilaa iyo 1960 kii oo qaatay xoriyadiisa maxmiyadii Ingiriiska.

Marka taas laga tago dhawr iyo sodon sanadood baynu dawlad ahayn wey dhacayaan oo waxyaabaha qaar kood wey iska dhac dhacayaan, maadama ay sidaaas tahayna wuxuu nabad galayada ka bilaabay Gobolka sool iyo gobolka sanaag isagoo hadda inuu maamul u sameeyo usoo tafaxaytay maamul macmal ah maamulkaas oo uu doonayo inuu sool iyo caynaba iyo aagaas oo dhan iyo gobolka sanaag ee ceerigaababa uu gacanta galiyo.

Waxaad la socotaan in hada laga sameynayo saldhigii ugu weynaa ee ciidamada Soomaaliya Laascaanood, taas oo dawladaha waaweyn dawalad ka mid ahi ay hirgalinayso, waxa kale oo jirta in lagu sii socodo dekada Laasqoray oo ka tirsan dalkeena oo iyana la rabo in deked Soomaaliya ay ka samayso waxyaabahas oo dhana waxa looga jeedaa sidii lagu carqaladayn lahaa Somaliland marka aan u soo noqdo baaqii ay dawladu soo saartay baaq aad u jilicsan buu ahaa kumuuna filayn difaaca qaranka loogamana fadhiyin, maanata waxaynu halkan uga hadlaynaa oo ka hadlayanaa sidii ay dalkeena u difaaci lahayn masuuliyaduna waxay saarantahay dawlada maadama ay dawlada saarantahayna maanta waxay ahayd in gunti giijis la galo in dawladu difaaca siyaasad cad ka yeelato siyaasadaasna ay soo bandhigto lkn in baaq iyo caalamiyo inaynu aduunyada u sheegno aduunyadu  wax walba waa ogtahay iyadaa inaga war roon waxay ahayd in siyaadad cad laga qaato, gudoomiye waxaan soo jeedin lahaa in loo yeedho halkan looga yeedho masuuliyiinta amniga sida ciidamada nabadgelyada si dalka iyo difaaciisa wixii loogu talagalay wax looga weydiiyo, su'aalo looga weydiiyo ayaan jeclaan laha.

Intaa markaan ka tago dee xalada weynu oghay oo maanta waxa weeye col iyo abaar baa la yidhi oo maant abaar iyo nabadgelyadii oo maanta cidhiidhi la soo galiyay labaduba wey jiraan; tii abaarta meel baynu dhignay gudi baa la sameeyay inaguna dee wixii Ilaahay inooga garto baynu ka geysanaynaa lkn arintaa difaaca waxaan qabaa in aynu qaraar adag ka soo saarno waan la qabaa xildhibaankii iga horeeyay ee halkan ka soo jeediyay in wadahadaldii Soomaaliya iyo Somaliland la joojiyo waayo ma garanayo wax alaala wax inoogu jira oo faa'iido ah, maadama ay nabadgelyadeenii iyo dalkeedii duulaan ku soo tahay in la joojiyo wadahadlada Soomaaliya iyo Somaliland aad baan u adkaynayaa.

Waxaan odhan lahaa dhamaan maanta shicibka iyo dawlad iyo xukuumad ee Somaliland inay difaac u diyaar garoobaan sidii dalka loo difaaci lahaa cadowga looga dhicin lahaa in xaalad adag la galo oo difaac intaas baa ku soo koobayaa. Wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdikariim Aadam Cali** {2mnt, 50sec}:- Bismilahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxaafadaba Asalaamu calykum; arinta aynu ka hadlaynaa maanta waa arin la xidhiidha Somaliland waxaan doonayaa horta marka hore inaan yidhaahdo inagu dadka soomaliyeed meel kastay joogaan colaad uma qabno shacab ahaan nasiib daro waxa jiraa waxa weeye Xasan Sheek oo ay ku soo oodantay oo waxkasta oo uu isyidhi ka qabo Soomaaliya ay uga suuro gali weyday ayaa fursad ka arkay khilaafkii yaraa ee ka dhacay Gobolada bariga Somaliland; mudane gudoomiye iyo mudanayaal arinta jirtaa waa arintaas xasan sheikh waxa la yidhi Awr Awr wado iyo nin cid kale wado midna kaama baydho. Ninkaasi waa Awr awr wado, mucaaradkiisii iyo umadii soomaliyeed ee uu madaxda u ahaa ayaa ka soo hor jeedsaday ordkii buu inoogu soo galay, waa Headles Chiken, chicken gawracan weeye oo isagoo rafanaya ina soo galay fidnaanu inoola yimi.

Waxaan soo jeedinayaa marka koobaad inaynu halkan ka cadayno; inagu dadka Soomaliyeed inaynaan colaad u qabin, Laascaanoodna aynaan colaad ku wadin, barigana aynaan colaad ka wadin.

Ninka la yidhaa xasan sheekh dadkiisii baa ku kacsan meel kastay joogaan.

Waxaan soo jeedin lahaa marka koobaad in la kala saaro maamulka Soomaaliya iyo ninka xasan sheikh labadaa inla kala saaro. Xasan sheikh wax xidhiidhoo inaga dhaxeeya, wadahal aynu la furayno iyo wax aynu la qabsanayno midina aanay jirin aynu halkan ka cadeyno dadka Soomaliyeed mucaaradka xooga badan ee ka soo horjeeda xasan sheekh, waxaan soo jeedin lahaa xukuumadu inay wada hadal la furto oo ay kula kulanto wadan ka mid ah wadamada aynu jaarka nahay in laga wada tashado xasan sheikh sidii dadka looga qaban lahaa oo umada looga qaban lahaa ee aanu dadka iskugu gubi lahayn.

Wakhti yar baa u hadhay Somaliland iyo dhamaan somali intay ka tiro leegtahay iniba meeshay joogtaba waa inay iska kaashataa xasan sheikh sidii dadka looga qaban lahaa.

Xasan sheikh wuxuu keenay proxy war, dagaal uu umado kale uu adeegayo ayuu keenay, hub uu wadamo kale ka soo qaatay ayuu keenay; Somaliland wuxuu u tusay inaanay somali ahayn ummadii kale ee somaliyeed dhexdoodii buu dab dhigay, goboladii dhexe waxa ka socda weynu ognahay maanta koonfur waxa ka socda weynu ognahay, xamar waxa ka socda weynu ognahay; mucaaradkiisii markuu u adkaysan waayay ayuu damcay maanta inuu inagu gal galimaysto oo uu tuso inuu halkan hawl ka wado. Wax hawla oo uu halkan ka wadaa ma jirto shaqana ugama banaana, xasan sheikh waa in laga qabto umada anigu intaas baa soo jeedin lahaaa dawladuna xukuumadu waa inay qayb libaax leh ka qaadataa arintaa. Aad iyo aad baa u mahadsantahiin, wa salaamu calaykum.

**Md. Saleebaan Axmad Carab** *(3min ,39sec)* ASC, kolay ajande xoog wayn baynu ka hadlaynaa, waxa aynu ka hadlaynaa fara galin ay inagu hayso dawlada Muqdisho ka dhisan ee fadhiidka ah, hadaan ugu horaysiiyo dawladan uu hogaaminayo Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi markii ay qabatay talada dalka waxay ku baqday nabada iyo wada xaajood ina Somaliland wixii ka xun lagu dhameeyo gogoshaas, waxa aynu oganahay inaan laga faa'iidaysan oo anay dhaqangalin, inay siidii tahay faragalintii ay inagu haysay dawlada ka dhisan xamar inay kasii daraysay inay markii dambe keentay inay soo galiyaan oo yimadaan shaqadii iyo qaskii ay wadeen ay bilaaban.

Waynu ku celcelinaynay gogoshaaso ilaa saddex jeer lagu baqay inay marwalba sii socotay oo aan dhag loo dhigin, imikana ay marayso ina dawlada ama maamul macmala Somaliland goboladeedi laga sameeyo, inta kalena baaq lagu sii fulinaayo lasii icamalinayey, ina iyada oo aad ogtahay mesha lagu ilaaliyo iyo sida ay nabada galyadii uga sii xumanayso meela ay yidhahdaan waan ka talinaynaa, ina ay Kun killometir (1000 km) diyaarada kasoo raceen halkaa fadhisin koodi ugu weynaa ay ka wadaan inay ka dhigaan mar hadii baaqi nabadeed ee lagu cel celiyey ay nu wakhtiga siinay oo imika bishii sidedaad maraya uu socon wayey waxaan ku talin lahaa, dawlada yadana talo ayaynu ku leenahay iyo inaynu ku kalmayno marba wixii hawla ee u yaala.

Tallada aynu siinayno dawladeena iyo maamulkeena waxa weeye dee nabadaynu ku baqanay oo socon waydey, faragalin uma ah imika Somaliland, hadaynu imika Somaliland sugi la haynoo inagu khilaafada keena wakhati kasta haynagu qadatee mudo dheer hadaynu raajicin la hayna oo siyasada iyo dublamaasiyada iyo wada hadal nabadeed iyo gogol aynu ku wadi lahayna, de maha imika dadka aynu isa hayno ee mesha soo galay ee usoo diyara garoobaya ee xoog iyo xeelada waxay hayeen isugu keenaya mesha imika waa dawlada tamarta daran een xamar ka dhisan weeye.

Haday caynakaa tahay waxan talo ku bixinayaa in si adag oo aad u adag lagaga hortago oo laysaga celiyo oo laga saaro Meesha, waayo eegasho imaka intaa ka badan oo la eegan karo ma ogi.

Waan soo dhaweynayaa qaybta sanaag ee qadatay gogosha nabadeed Illaahay waxaan ka barayayaa inta hadhay sida ay u socoto si wanageeda iyo gaba gabadeeduna inay ku gaba gabagabowdo nabada iyo wada nolashihii Gobolka Sanaag ka dhexeeyey.

**Md. C/naasir Yuusuf Cismaan (Qodox***) (8min 28sec)*:- ASC, Mudane Gudoomiye iyo mMdanayaal. Arrintan Laascanood aynu manta u fadhino Gudoomiye hortu siday tahay hadaan taarikhada dib ugu noqodo saddexdii sanno ee ugu danbeeyey ayey soo socotay malinaba meel ayey taaganeyad. Malintaa ay laascanood bilaamatay dulaankaa lagu soo qaaday horta Somaliland oo dhan ayaa lagu soo qaday. Inaguna inata aynu ognahay (2023) waa inagii halkan golaha ka saaranay gudi, xaalada malintaa tagneyda iyo xaga ay maanta wax marayaan waa kaaf iyo kala dheeri.

Somaliland inatay laascanood gacanta ku haysay horu mar caafimaad,wadooyin dad isku duuban inatay Somaliland uqabatay waligood looma qaban, shacabka reer laascanood horu marka ay ku naloonayeen gobolada kale ee Somaliland qayb bay ka ahaayeen.

Ciidamada Qaranka ee maamulayey ee gacanta ku hayey ee amniga sugayey, intay maamulayeen waligood qof reer Laascanoda qori caradii kumay fiiqin.

Horta dhibtan dhacday waa dhibaato la soo waariday, shacabkii Laascanood loo soo waariday oo Somaliland weerar qaawan lagu soo qaday, sida ay wax u socdeen waynu arkaynay. Malintaa tallo ayaa ina seegtay talada ina seegtayna waxa ay ahayda inaynu midnimo ku galnaa bay hayd laakiin wixii socday waynagii ogayn dambigii dhacay waa lawada lahaa, mantana sawirka muuqadaa kii maalintaa hore dhacay wuu ka sii fool xun yahay.

Maalintaa Laascanood oo kaliya ayay ahyd, mantana Ceerigabo ayaa dulaan lagu soo yahay, waxaynu arkaynaa intaa oo kun oo ciidamo ah oo la tababarayo oo xagee ku soo soocda, Somaliland bay ku soo socdaan iyo goboladii kale, markay arrintu halkaa taagan tahay Somaliland dhaqan bay lahaan jirtay xaaladan oo kale markay ku soo wajahanto.

Madaxweynaha jooga tallo qaran buu sameyn jiray golayasha ayuu isagu yeedhi jiray dadka deeganka ayuu abaabuli jiray kolba arrin taasi khusayaso Xisbiyada ayaa laysugu yeedhi jiray tallo ayaa lagu gali jiray kolaba arrintaa tagan lagu gali jiray, hada imika xukumadu iyo Madax weynuhu tii ma sameyan golaha wasiirada ee shalay fadhistay ayaa ugu horeysay baaqa waydaa ee hada la sheegayo la sii dayey, anigu waxan qabaa madax weynaha ana usoo jeedinayaa mudane Madaxweyne dalkan adiga maamula adiga

hogaamiye ah shantan milyan ee Somaliland adigay ku eega yaan dhawaqaga oo ayn ku doorteen talo qarran qabo oo umada isugu yeedha oo waliba dadka deegan ka oo golayaasha ku jira oo talo wax ku qaban kara isugu yeedh oo abaabul.

Qorshe cad oo ka leedahay dulaanka lagu soo qaday Somaliland umada u bayaami oo u sheeg, Somalidu waxay tidhahdaa dhiciska inta mindida loo so sido ayuu dhintaa, ma waxa aynu eeganaa inta ciidamadaa la soo tababarayo ay Burco iyo Ceerigaabo imanayaan ,waa markii kowaad tariikhada 34 sanno calamaan aan Somaliland ahayn laga taago ama dawlada laga dhex dhiso dhulka Somaliland.

Waxa socda xuduudo beeledyo, haday xuduudo beeleda socdaana wixii ka dhasha geeska oo dhan ayey smaeynaysaa Somaliland oo kaliya sameynmaysee ilaa Itoobiya ayey sameynaysa, geeska oo dhan ayaa halkaa wixii ka xumada ay sameyanaysaa,

Madaxweynaha anigu intaas ayaan u soo jeedinayaa, Soomaliya ayeynu ina badan ku celcelinay waa dad aynu is hayno wali taarikhada may dhicin afar iyo sodankaa sanno maalin aynu dawlada Soomaliya heshiis ahayn, cadowga Somaliland waa Soomaliya, ninbaa leh ma go'ikartid iga mida baad tahay, waxba ma sameyn kartid, tiisina way baylah santahay, inagu waxa aynu u bahanahay hadii shaylatoole 2012kii markii wada-hadalka Somaliland iyo Soomaaliya la furayey aynu qalada ku dhacanay oo 13 sanno ay wada hadaladaasi ma dhalays ahayeen miyaynu ku sii jiraynaa.

Madaxweynaha waxaan u soo jeedinayaa Mudane Madaxweyne mar may ahayn oo laba may ahayn xukumadada ama go'aan ka soo baxay oo ah waxaan joojinaynaa wada-hadalada Somaliland iyo Soomaaliya ilaa hadana ma cada talabo cada oo lagu joojinayo, xeer baa lagu furay xukumada ka yimi oo markii hore dabar ahaa oo ay ka wada fadhisteen labada gole.

Madaxweynaha waxaan u soo jeedin lahaa inuu golayasha u soo gudbiyo xeerki lagu joojin lahaa wadahadalada, haday xukumadu soo gudbin waydana, waxaan soo jeedinayaa inaynu laba deedana gole isku nimadano oo aynu arintaa joojino kolay hadaynu isla qirsanahay inaaanay fa iido inoo la hayana khasare waxaan ahayn moonayane.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal inaga waajib baa ina saaran dalkagi oo la qaybsanayo oo maalin walba qeyb la jarayo xanuunku leeyahay wada garanaysaan, qof kasta oo Somaliland ah culeys bayku haysaa, maanta taago ka mida Somaliland inta calan keenu ka maqan yahay inaga fadhi inoo ma yaalo, somalidu waxay tidhahadaa qaniinayo qaniinya kaa fujisa.

Inaynu dawadayaal ka noqono waxa ka dhacaya bariga sool qaran keena ayey laf jab ku tahay inagoo waliba wax badan dhawrayna oo donayna inanaan wax badan halkan ka

sheegin ciidamadeenana sharaf iyo wanaag u hayna manta awood aynu dalkeena ku difacano waynu haysanaa lakiin hagrasho ayaa jirta waxay aniga ila tahay gudoomiye aynu arrintan gudi usaarano masuuli yiinta ay khuseesana aynu la kulano xukumaduna qorshaheeda saxda ah umada how bayaamiso wixii inta inooga soo baxa aynu ka talo qaadano lakiin absuludli lama eegan karro waxa halkaa ka socda.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Raambo)** *(4min 53sec):-* Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal waad mahadsan tihiin. Mudane gudoomiye waxaad bar yahan danbe ogeeda Xaaladda Bariga gobolka Sool uu galay bilihii u danbeeeyey aad ayuu uga duwan yahay sidii uu markii hore ahaa. Markii hore waxa ay nu ogayan xogo kala duwan oo kala jaad ah ayaa dagaal kula jiray ciidamada Somaliland. Xoogagaas isbarkani waxa ay u badnaayeen dad deegaanka ah. Hada se waxa gobolka si toos ah u soo fargelisay oo gacanta ku haysa Bariga Sool xukuumadda Soomaaliya ee fadhigeedu yahay aqalka ku yaal Xamar ee shisheeyuhu ku waardiyeeyo. Waxa ay ku shaqaynaysaa inay ka dhisto waxa ay ugu yeedhay maamul goboleed. Waxa yimi raysal waasaaraha xukuumadda magac u yaalka ah. Waxa hada joogaa madax ka tirsan xukuumaddaas, waxaana la filayaa in kuwo kale yimaadaan.

Marka xaalku sidaas yahay, tallaabooyinka ay Soomaaliya qaaday waa kuwo duullan ah oo looga danleeyahay in adduunka laga dhaadhiciyo in aan Somaliland buuxin shuruudaha dawladnimo ee ku cad Xeerka Caalamiga ah. Marka duullaanka caynkaas ah la inagu soo qaaday xukuumadda Somaliland waxa ay ku wajahday laba arrimood:

**Qodobka kowaad** Inay ka aamusto inta diyaar garowgu socdo iyo inta ay Soomaaliya fullinayso hawlaheeda.

**Qodobka labaad** Marka Soomaaliya ay meel wax gaadhsiiso kadib ayay Somaliland war saxaafadeed wayd ah ka soo saartaa. Arinkaasi waa arrin aad u culus oo u baahan in si gaar ah wax looga qabto, goluhuna ka dodo, innagu gole ahaan waxa waajibkeennu yahay inaynu xisaabinno xukuumadeenna oo sida muuqatay ku guuldaraystay inay wax tallaabo ah oo macno leh ay qaado, xitaa ha noqoto diidmo (protest) ay gaadhsiiso adduunka ku haya xukuumadda Soomaaliya nafta. Sida ay xukuumadda Somaliland u dhaqmaysaa waa yaraysi. Waa ta dhiirigelisay Soomaaliya. Dorraad waxa hadlay wasiirka Arimaha Gudaha oo yidhi shir degdeg ah ayaa Golaha Wasiiraddu ka yeelanaya xaaladda. Balse waxa Golaha Wasiirada ka soo baxay waa uun wixii Wasiirka Arimaha Guduhu yidhi. Ma jiro nuxur iyo qorshe ay xukuumaddu sheegtay ama inoo soo gudbisay Duullaanka ay Soomaaliya hada soo qaaday waa mid aanay hore u soo qaadin marka la eego sodonkii sanadeed ee u danbeyeey. Waxa ay cagaha soo dhigtay geyiga dhulka Somaliland, taas oo ah weerar qaawan oo lagu soo qaaday is haysashada dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Maamulka ay doonayso inay dhisto xukuumadda Xamar waa mid ku abuurayo xasilooni darro aad u wa **Qodobka** yn magaalooyinka Ceerigaabo iyo Burco iyo guud ahaan gobolada Bariga. Waa dagaal ay doonayso inay cullays gudaha ah ku saarto Somaliland. Maaha mid lagaga jawaab celin karo, war saxaafadeed la soo saaro goor xeedho fandhaal kala dhaceen. Waxa aynnu og nahay in si sidaas la mid ah ay Soomaaliya doonayso inay gobollo kale ka furto furimo hor leh. Annigu waxa aan qabaa in Goluhu awoodda saaro lama arimood:

**Arrinka kowada**, in xukuumadda loogu baaqo inay bedesho siyaasadeeda ku wajahan bariga Somaliland ee lagu soo duullay oo ay Golaha ku keento mudo todoba malamood gudohood ah qorshe cad oo ay ku wajahayso dagaalka ay Soomaaliya soo qaaday.

**Arrinka labaad,** in aynu doodda wadno oo **u yeedhno Wasiirada Gaashaandhigga iyo Arrimaha Gudaha** oo aynu si dhab ah u ogaanno waxa ay xukuumaddu maagan tahay, haddii ay jirto wax ay maaggan tahay. In aynnu soo saarno qaraar oo la mid ah tii ay Golaha Wasiiradu soo saareen wax micno ah ma keenayso.

Waa inaynu xukuumadda ku cadaadinno oo kula xisaabtanno inay shaqadeeda gudato oo dalka af iyo addinba kaga difaacdo duullanka lagu soo qaaday. Sidoo kale waxa aan Golaha u soo jeedinayaa in la saaro guddi si gaar ah arimahan u baadha oo xog rasmi ah Golaha uga keento sida wax u socdaan. Madaxweynaheena waxaan leeyahay Mudane Madaxweyne aamusnaantu xal maaha, karaamadii umadaada ayaad huwan tahay, Somaliya markay far inagu soo taagto waa inaad shantaba ku taagtaa, anaguna waanu kugu taageersanahay.

**Md. Fu'aad Axmed Cali** *(2min 15sec):-* Mudane Gudoomiye waad mahadsan tahay, Mudanayasha golaha fadhiya iyaguna dhamantooda way mahadasan yihiin, Waa arrin muhiima ina kolba xaalada taagan ee wadanka laga hadalo. Dooddeeni hore waxa ay ahayd xaalada Abaaraha meel fiicana waynu dhignay idanka ILLAHAY inta dhimana gudida ayaa inoo soo dhamaysa tiraysa

Dooddan maantana waa arrin xasaasi ah iyaduna. dulaanka ay dawlada taagta daran ee Soomaliya ku soo qaday dalkeena. Marka hore faragalinta Xasan Sheikh iyo xukumadiisa xabaala qod ka ah, fal qalalada colaada cunfiga ay ka aloolayso Sool bari aad iyo aad baan u cambaareyanayaa, xukumadaasina waxa ay rabtaa inay geeska oo dhan ay ka dhigato xabaalo, markaa arrinka waxaan ku baraaru jinaynaa beesha calamka iyo midowga africa.

Sidoo kale waxaan mar labaad soo jeedinayaa **in arrimaha ka tagan Laascanood masuuli yiinta ay khuseyso uu golahani u yeedho oon ka waraysto.** Mar saddexada waxaan adkayna yaa Qaraarka uu soo saray goluhu ee uu ku joojinayo wada-hadalada, wada-hadaladaa ma dhalaysaka ahi waxa ay wiiqeen arrimaheeni dibada waxay dhaawaca u

gaysateen cid kasta oo ina danaynaysay, waxa ay dariiqa u fureen dawlada taagta daran ee Soomaliya.

Waan adkaynayaa **in wada-hadaladaa gabi ahaanba in la joojiyo** xukumaduna ay u soo gudabiso laba gole, sidii ay waagi hore u fureen labada golle imikana u joojiyaan, xeerna laga soo saaro haduu ALLE ogolaado aad iyo aad baan intaas u adkaynayaa. Khayra badana waan rajaynayaa WSC.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** *(4min, 13sec): -* Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal waxaynu ogsoonahay xaaladaha ka taagan Sool inay soo bilaabantay wakhti hore oo xukuumada hada jirtaba ka horeeysay, Gobolkaas sida dagaaladu ku bilaabneen, sida colaaduhu uga dhaceen iyo sida gacanta uga baxday intaba waan ognahay oo waxaynu dib ugu noqono maanta ma taagna.

Waxaan xusayaa xukuumada iminka talada haysa markay dalka la wareegtay waxay diyaarisay nidaamkii ugu wanaagsanaa oo waxay samaysay gudi nabadeed si loo yareeyo dhiig daata iyo dagaalo kale oo sii socda, iyadoo u martay dadka kale ee degan wadamada jaarka ah iyo dariiqyo kale oo kasta oo arrintaas lagu soo dabaali karayo, fursad baa halka uga abuurantay xukuumada Muqdisho markii Laascaanood ka baxday gacanta Somaliland, waxayna u arkeen Sool ama Magaalada Laascaanood inay tahay fursad lagu carqaladayn karayo dawladnimada Somaliland, fursadiina waxay u badaleen inay ficil ahaan uga jawaabaan.

Xukuumada cusub waxyaabaha kale ee ay samaysay waxa ka mid ah inay diyaarisay ama tababartay, tayadoodana sare u qaaday ciidan maleeshiyaad tiradoodu 10 kun oo askari aan ka yarayn oo markii hore isu abaabulay qaab qabali ah, kuna abuurmay colaadii Gobolka Sool iyaguna. Ciidamadaasi waxay iminka qayb ka yihiin militariga Somaliland iyagoo tababaran, waana waxyaabaha ay xukuumadani qabatay.

Waxa aan xusayaa, tallona ku soo jeedinaya iyadoo dedaaladaas xukuumadu dhinac ka soconayaan, waxa hadana jirta arrimihii siyaasadeed iyo diblomaasiyadeed iyo wadiiqooyinkii kale ee u baahnaa inay caawiyaan arrinta cududa militari ee arrimahaas lagu wajihi karayo. Waxaas oo dhan oo iskaashanaya, waxa Gole ahaan u baahanahay inaynu tallo ka gaysano doorkeeniina ka ciyaarno.

Waxyaabaha aan talada ku soo jeedinayaa oo secondment-garenayanaa **in la saaro Gudi farsamo oo Mudanayaasha Golaha ah** oo si dhaw ula shaqeeya, lana socda Xukuumada si aynaan uga dhago la'aan hawlaha soconaya ee ku wajahan Gobolka Sool.

Sida mudanayaal iga horeeyay xuseen uma baahna marka xaaladuhu sidan oo kale noqdaan ama duniduba maanta siday tahay nin awood leh uun baa noolaan karaya, ninka noolaan karaya ee nabadgalyo helaya ee dalkiisa maamuli karaya ee joogi karyaa waa nin

awood leh, waxaan soo jeedinayaa in boqolkiiba boqol (100%) la tayeeyo Ciidamada Somaliland, in shacabka la abaabulo, in la isu diyaariyo colaad wakhti dheer qaadan karta, waxaan aaminsanhay hamiga Muqdisho yaalaa inuu ka durugsan yahay Sool, waxaan aaminsahay in miisaaniyada soo socota 60% la galiyo Ciidamada, waxaan aaminsahay in cudud iyo dibmlomaasiyada labada loo diyaargaroobo,

Arrimahaas oo dhami waa waxa kaliya ee wax la iskaga dhicin karayo, shacabkana in la diyaargareeyo oo dawlada ahaan iyo shacab ahaanba la diyaargaroobo, canaan iyo dhaleecayn waxba ma tarto, sida kaliya ee wax lagu xalin karyaa inay sidaas tahay baan aaminsahay. Muqdisho iyo Xasan Shiikhna waxaan leeyahay labadeena seefood waa tii saawir noqota. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Jaamac Kood-buur** *(4min, 39sec): -* Dawlada Somaliya la yidhaahdo oo nool oo jirta ma jirto waa ninkaas wareersan iyo villa Somaliya, waa halkaa siyaasada guracan ee dabka lagu galinayo geeska ay ka soo baxayso.

Somaliland waxa ka go'an in si nabad ah xal loogu helo tabashooyinka deegaankaas, haseyeeshe waa in aanay u dulqaadan faragalinta shihseeye marnaba, colaada Sool waa mashruuc siyaasad dabadeed oo lagu wiiqayo qaranimada Somaliland. Beesha caalamku waa inay la timaada mawqif cad oo taageero u muujinaya Somaliland si loo xakameeyo Villa Somaliya iyo saaxiibadood, waxa loo baahan yahay diblomaasiyad cad oo lagu fashilanayo qorshahaas liita ee lidka ku ah Somaliland.

Waxaynu u baahanahay inaynu xoojino Sirdoonka gudaheena iyo inaynu tayayno Ciidanka Qaranka. Waxa kale oo aynu u baahanahay ollole, wacyigalin, is-faham iyo abaabul bulshadeena lagu wacyigaliyo oo la fahamsiiyo halka xaalada dalku maanta marayso.

Somaliland waa inay ka kortaa siyaasadii qaboobayd ee ay ku dhaqmi jirtay oo ay la timaadaa siyaasad furfuran oo awoodda sidii ay ku furfuri lahayd Villa Somal maamulada ay sheegato. Waa inaynu la nimaadnaa siyaasad siyaasadii hore ka duwan.

Arrinta maanta taagani waa arrin soo bilaabmatay 2022kii, maalintii caalanka laga taagan Gobolkaasina wakhtigaas bay ahayd, laakiin maanta waxaynu baahanahay midnimo iyo in inagoo gacmaha is-haysana ka hortagno faragalintaas qaawan ee ka imanaysa Villa Somaliya.

Villa Somaliya kali kuma ah mashruucan oo wadamo kale oo Shiinuhu ka mid yahay ayaa ku jira, wadamo kale oo Carbeed baa ku jira, waa inay siyaasadeenu fogaataa oo xulufadeena iyo saaxibadeena gaadhsiina oo aynu gaadhnaa.

Caalamka maanta is-badel wayn baa ka dhacay, awood baa la isku muquuninayaa maanta caalamka, marka inaguna waa inaynu taas fahamnaa oo u diyaargarawnaa ficil kasta oo inaga yimaada iyo wax kasta oo aynu ku soo celinayno Gobolkaas ka shaqaynaa.

Gole ahaan, waxaan la qabaa Mudanayaashii hore **in Gudi loo saaro hawshaas ka soo tallo-bixisa,** xukuumadana aynu xog ka helnaa qorsheheeda ay ku waajahayso arrintaas, waayo uma eeka hawl fudud oo sidaynu u waajahnaa cida inaga soo horjeedaana u waajahayso. Waxaan qabaa Somaliland inay gaadho maamulada kale ee Soomaaliya sidii aynu furagalin lahayn, Somaliland kali maaha oo waxa jira deegaano badan oo ka mid maamuladaas oo laga taageero, markaa waa in siyaasadeenu halkaas gaadhaa oo xulufadeena balaadhinaa, waana inaynu ka baxnaa siyaasadii ahayd is-difaaca iyo siyaasadii qaboobayd. Wa Bilaahi Tawfiiq.

**Md. C/kariim Muxumed Maxamed** ***(6min, 59sec):-*** Shir-gudoonka Golaha iyo Xildhibaanada ASC, Mudane Gudoomiye iyo Mudnayaal, dooddan aynu maanta fadhigan ku qaadanayno ee xaalada gobolada bariga gaar ahaan magaalada Laascaanood iyo deegaanada Sanaag Barri.

Runtii sidii Xildhibaanadii iga horeeyay doodda iyo ra'yigooda ay ku dareen xaalada deegaanadaas ka taagani waa xaalad Somaliland loo soo waariday oo dadka deegaankaasna lagu kiciyay, sidoo Kalena looga golleeyahay in qaranimada Somaliland lagu wiiqo. Si loo jabiyo doodda Somaliland ee fagaarayaasha caalamka ayay dawlada taagta daran ee Soomaaliya si ay ugu dooddo oo u tidhaahdo deegaano Somaliland ka mid ah ayaa nidaamkeeda dawladnimo ka shaqaynayaa, waa ujeedada iyo aarraada ka dambaysa dooddaasi.

Xukuumada tadalada haysa waxay u muuqataa in dhacdooyinkii u dambeeyay ee wakhtiyadan u dambeeyay dhacayay marka dhacdooyinkaasi dhacayeen ama dawlada Soomaaliya ka waddo deegaanadaas waxay marka hawshaasi dhacdo ka soo saaraysay qaraar hadal ah ama kulan ay ahayd inay noqoto (pro-active) oo dal ahaan iyo qaran ahaan aynu diyaargarawga iyo masuuliyada xukuumada saaran ay ugu diyaargarawdo, haday noqoto kulankii maalintii dhowayd ee Shirkii Golaha Wasiirada iyo haday noqoto safarkii Raysal Wasaaraha Soomaaliya Xamse Cabdi Barre uu ku yimi ay ka soo saartay Xukuumadu.

Waxaynu baahanahay inagoo isku duuban inaynu ku wajahno Xaaladaas oo saddex sanno ee u dambeeyay arrintan laga soo shaqaynayay. Waxa ay maanta waddo Dawlad Soomaaliya iyo xaaladaha ay ka abuurayso deegaanadaasi waa doodda ay ku doonayso inay ku jabiso qaranimada Somaliland.

Somalilnad cadawga koowaad ee ay leedahay waa Soomaaliya, 34 sanno aan qirsanayn qaranimadeena oo diidan, sidoo Kalena dadka reer Somaliland dhibaato ku filan u gaystay oo dhibaatooyinkoodii ilaa maanta ay taagan yihiin oo dadkii loo gaystay raadadkoodii sii muuqdaan.

Waxa runtii muuqata dariiqa ay Xukuumadu ku socoto ee ay ku wajahayso xaaladaas iyo qorshaha ay dawlada Soomaaliya ka wada gobolada barigu inay yihiin laba dariiq oo kala duwan, waxaynu u baahanahay inaynu xaaladaas ku wajahno inagoo garteena akhrisanayna, diyaargarawga ay inooga baahan tahay ee xaqiiqada ah ku wajahno oo la nidaamno.

Dhawrka qodob ee aan doonayo inaan soo jeediyo waxa kow ka ah Somaliland inay la timaado siyaasad pro-active ah, siyaasad qorshaha iyo hawlaha socda aynu ku wajahayno oo ugu diyaargaroobayno oo ciidamadeena iyo difaaceena, dadkeena iyo bulshadeena dareenka saxda ah ee Gobolada laga waddo ee Somaliland lagu soo qaaday ugu diyaargarawno oo ah xaalad dagaal.

Waxa kale oo ay doonaysaa Dawlada Soomaaliya inay deegaano kale oo Somaliland ah xaaladaas galiso. Waxaan soo jeedinayaa siyaasadii qaboobayd ee aynu ku wajihi jirnay Soomaaliya ama cid kasta oo Somaliland duulaan ku ah inaynu siyaasad aggressive oo kulul oo dalkeena aynu ku difaacayno, qaranimadeenana ku ilaalinayno aynu ku wajahno inagoo cidna uga habran.

***Waxa halkan, ka soo jeedinayaa:-***

1. In Fadhigan Golaha uu qaraar rasmiya oo xaalada gobolada barriga iyo deegaanada Laascaanood dawlada Soomaaliya ay ka waddo ee qaranimada Somaliland ay ku faragalinayso iyo dagaalada deegaanadaas ay ka hurinayso ka soo saaro aynu kula wadaagayno dawladaha caalamka, saaxiibadeena iyo beesha caalamkaba.
2. Wada-hadaladii Soomaaliya aynu kula jirnay aynu xeer ka soo saarno oo xeerkii hore loogu furay Golayaasha la mariyo, xukuumaduna qaraarkii ay soo saartay aynu xeer u badelno oo labada Gole ee Guurtida iyo Wakiilladu xeer u badelaan oo ansixiyaan.
3. Inaynu ka shaqayno xoojinta Ciidanka Qaranka iyo Saanadda Ciidanka oo aynu u baahanahay in xaaladaas Gobolada barri ka soo cusboonaatay ciidan ahaan iyo shacab ahaan iyo dawlad ahaan u diyaargarawno, miisaaniyadeena iyo intii awooddeena ah sanaad iyo ciidanba ka yeelano, waana siyaasad aynu difaaca qarankeena kaga shaqaynayno.
4. In Golaha looga yeedho oo fadhi xidhan la yeelano Wasiirka Gaashaandhiga iyo Masuuliyiinta kale ee ay khusayso oo xaaladaas iyo sidaynu u wajahayno tallo midaysan ka yeelano. WSC.

**Md. Mustafe Axmad C/laahi (Khayreeye)** *(16min, 50sec): -* ASC, salaam, Mudanayaal fadhigan aynu kaga hadlayno xaalada guud oo ajandaheena ku jiray sidaynu u waajahayno hadba duruufta dalka iyo xaalada uu ku jiro.

Waxaan Mudanayaasha ka codsanayaa in miisaan leh nin waliba u contribute-gareeyo xaalada dalka gaar ahaan xaalada barriga siiba Gobola Bariga Sool si wax maangal ahi uga soo baxaan hay'addaha ay khusaysaana ku dhaqmaan, waana in arragtidaasi inaga noqon arragti xisbiyeed oo kale iyo kala duwanaanshiyaha afkaarta siyaasadeed ee dalka gudihiisa taala markaynu ka haldayno arrimahan heer qaran ee taabanaya qadiyadeena jiritaan.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, hadii aan ka hadlno arrimahaas ka soo cusboonaaday barriga Sool, laba arrimood ayaan anigu u kala qaadayaa, mid waa dawladaas muqdisho ka dhisan oo mudanyaal badan anigoo ku ixtiraamaya aragtidooda ay halka ka gudbinayeen dhaliil iyo maagis ninkaas Muqdisho jooga ee miskiinka ee 30 kun ee Afrikaanka ahi ilaaliyaan, nin baa la yidi hebel baa ku maagayaya, markaasu yidhi "awalba col baanu ahay" Soomaaliyada iyo Muqdisho cidda soo marta ama ka talisaa markastaba jiritaankeena waynu isku haynay, colaad siyaasadeed baana inaga dhaxaysa, taas oo salka ku haysa umadnimadeena iyo gobonimada aynu shalayto ku tagnay midnimo Soomaaliyeed oo la raadinayay 50 sanno, la soo noqoshada aynu la soo noqonayna waxaynu ku taaganahay xaqii sharci ee internationally aynu xaq u leenahay.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan taageerayaa Mudanayaasha soo jeediyay **inaynu joojino Wada-hadaladii Soomaaliya** aynu kula jirnay, maadaama markaan qiimaynay waxaan colaad iyo cunsuriyad ahayn aanaan ka faa'iidin.

Waxaan soo jeedinayaa Xukuumada uu hogaaminayo Madaxweyne Cirro in arragtida cambaarayn iyo shirar la qabto aanay ku ekaane arragtidaasi ka dhab noqoto in wada-hadaladii Soomaaliya aynu joojino oo principle inaga noqotaa, waayo wada-hadalku waa niyad wanaag, niyad wanaagna inagama dhexeeyo.

Waxaad moodaa in Mudanayaashu sii dhexgalayeen technically halkuu marayo iyo siduu noqonayo, ma xeer buu noqonayaa? Iyo ma labada gole ayaa fadhiisanayaa? Arrimahaas shuruucdeena wax ka tidhi, xeer baynuna ka soo saari doonaa Insha'alah oo markeeda la gaadhi doonaa, laakiin principle aynu isla qaadanaynaa waxa weeye inaynu si toos ah u joojina Wada-hadalada Soomaaliya intaynu kal-fadhigan aynu ku jirno fadhiyadiisa soo socda xeerkii aynu wada hadalada soomaaliya ku joojinayna soo saarnaa si macaamilkii inaga dhexeeyay nimankaas aynu u joojino.

Inaynu siyaasad cad oo qoran ka yeelano arrimahaas barriga ka socda, anigoo khaas ahaan ka soo jeeda Xildhibaanada laga soo doorto gaar ahaan gobolka Sool, waxaan halkan doonayaa inaan uga mahadnaqo Xildhibaan Guruuje oo aan uga mahadnaqayo sida koran

ee uu had iyo jeer Mudanayaasha deegaano doorashooyinka kale ka soo baxay marka la eego uu uga xog-ogaalsan yahay xaalada siyaasadeed ee deegaanadaas Sool.

Deegaanada Gobolka Sool khaasatan Degmada Caynabo iyo duruufaheeda siyaasadeed si aynu u korino, hadii ay inaga dhab noqoto inaynu difaacno dalka halka dalka laga difaacayaa waa Caynaba, marka Caynaba si dalka looga difaaco waxay u baahan tahay horumar iyo in duruufaheeda wax bada laga qabto, waxay u baahan tahay in infrastructure-keeda wax laga qabto, markaynu eegayno deegaankaas Sool barri waxaynu haynaa Caynaba oo degmadii labaad ee Gobola Sool ah, oo aynu joogno maanta, taas ayaa u baahan inaynu Miisaaniyada wax uga samayno, xaalad gaar ah ka dhigno.

Dawladana waxa laga doonayaa arragtida ay qaadanaysaa inay noqoto meelaha ay Ceergaabo iyo Caynaba ka mid yihiin ee dalka laga difaacayo xaalad gaar ah noqdaan baa la doonayaa, si gaar ah loo xoojiyo, miisaaniyad gaar ah loo sameeyo oo aanay degmada Ceergaabo iyo degmada Caynaba aanay la mid noqon degmooyinka kale, tusaale ahaan Hargeysa, Berbera, Oodwayne iyo Saylac, waayo waa meelo fasiraad gaar ah laga bixiyo oo u baahan inaynu muujino oo korniinkiisa iyo dhismihiisa ka qayb-qaadano baan soo jeedinayaa. Waliba sida xukuumadu horena u soo jeedisay waxaynu u baahanahay kababkii iyo miisaaniyadii dhaqaale ee ku bixi jiray deegaanada aan iminka gacanta dawlada ku jirin in lagu xoojiyo Deegaanadaas kale.

Xukuumada waxaan u soo jeedinayaa qadiyada umadani leedahay iyo jiritaankeeda wadamada aynu kala hadlayno ama negotiation la galayno ama caawimo waydiisanayno waa inay noqdaan waddamo aan qadiyadeena dagaal kula jirin, waynu ognahay in Somaliland ilaa 30 sanno wanaagaas, dimuqraadiyadaas, dawladnimadaas iyo shuruudahaas ay bixisay ka markhaati kacday oo ina aqoonsatay ma jirto, hadana waa la inoo kala dhawyahay, dawladaa iyagoon ina aqoonsan sidii jiritaan qaanuuniya oo aynu leenahay inoola macaamila, dawladona si ka duwan bay inoola macaamilaan, dawladona degaal bay inagula jiraan, marka Xukuumada waxaan u soo jeedinayaa in aanay luminin saaxiibo lagu kalsoonaan karo oo dalka wax gashaday oo ay ku luminin qaar aan qadiyadeena ogolayn oo dagaal kula jira.

Qodobka kale aan ka hadlayaa waa arrimaha hubka, waxaynu ognahay wada-hadaladii aynu la galnay waxay u saamaxeen in cunaqabatayntii hubka laga qaado dawladaas Muqdisho ka dhisan, sidoo Kalena waxa loo baahan in umadaha kale iyo dawlahaha caalamka xukuumadeenu inay gaadhsiiso, Gole ahaana aynu gaadhsiino maadaama golihii sharciga ee umadu dooratay ee ka wakiilka ah aynu nahay dhibaha ka taagan ee intii cunaqabataynta hubka laga qaaday taagan, waxaynu ognahay intii hub u imanayay dawladaas Muqdisho hub kaliya oo gacanteeda gaadhay in aanu jirin ee meelo dhexe lagu degayay hubkaas, waxaynu ognahay in Gobolada dhexe hub lagu degay, Bada Cas hubkii marayay laga degay.

Sababta keentay waxa weeye marka dawlad aan lahayn awoodii maamul ee uu ku maamuli lahaa ama ku kasban lahaa masuuliyadaas loo dhiibay, marka hubkaas gacanta u galay shacabkii iyo kooxo aan sharciyad lahayn, marka cod baynu ku shagaynaa, dawladana ugu baaqaynaa in arrimahaas hubka laga galo taxadar wayn.

Waxaan Gudoomiye soo jeedinayaa xoojinta Gobolada Bariga khaas ahaan Sool iyo Sanaag in laga shaqeeyo nabadgalyadooda, horumarkooda, kaabashayaasha dhaqaalohooda, waxaana si gaar ah mudanayaasha uga codsanayaa inay taageeraan oo igu raacaan doodda ah in Gobolkaas Sool iyo Sanaag kutalagal gaar ah looga sameeyo Miisaaniyada Qaranka iyo horumarka dalka in percentage gaar ah loo sameeyo, sidaynu Mudane Gudoomiye ognahay kabka waxa ugu yar kabka degmooyinka ama dawlada hoose la siiyo, waxaa dhacday oo aan uga xunahay in kabkii laga gooyay 40%, kabka degmooyinkaas laga jaray wuxuu dhaawacay hawl socodsiintii degmooyinkaas barriga ee cadawgu ku hareeraysan yahay.

Marla waxaan soo jeedinaya in si gaar ah loo eego oo kababka iyo Miisaaniayda deegaanadaas la siinayo khaas looga dhigo oo aan lala simin degmooyinka kale.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa oo aan aad uga xunahay, halkan inaynu ka cadaynona ay tahay maamulkaas gobolka Sool bari laga dhawaaqay ee sharcidarada ah in halka aynu ka taaganahay umada iyo dawladaha aduunka iyo geeskaba u cadayno inuu khatar ku yahay amniga geeska iyo Qaranimada Somaliland, in talaabo degdega iyo siyaasadii lagaga hortagi lahaa xukuumadu la timaado oo aan ahayn cambaarayn.

Waxaan soo jeedinayaa Munayaal hadii aynu maanta ka aamusno arrimahaas oo aynaan meel culus dhigin waxa su'aal lagalin doonaa jiritaanka hay'addihii sharci dejinta, waxaana ku baaqayaa inaynu midayno mawqifkeena, ilaalin wada jirkeena oo aynu tusno shacabkii ina soo doortay in Golahani yahay tiirka adkaynta iyo ilaalinta qaranimada Somaliland.

Waxa kale oo aan taageerayaa (secondment) Mudane C/kariim Muxumed ee **ah in Wasiirka Gaashaandhiga iyo Hay'addaha kale ee ku shaqada leh aynu halkan kulan xidhan la yeelano oo arrinkaas la dhayalsan,** waxaan soo jeedinayaa in arrintani arrin axukuumadeed ahayn ay arrin qaran tahay, madaama national issue tahayna Madaxweynuhu Gudi qaran oo balaadhan oo golayaasha qaranku jiraan sameeyo si statement qaran uga soo baxo.

Waxaan Madaxweynaha dhaliilahaas aan sheegay markaan ka imaado ugu hambalyaynayaa kordhinta uu Ciidanka mushaharka ugu kordhiyay oo dhiirigalin ciidanka u ahayd, waxa kale oo aan ku hamblayaynayaa qaramayntii ciidamada camuud ka badan ee aan mudanayaashii ka qayb-qaatayna ka mid ahayn oo ahayd talaabo ku dhac leh, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in dhiirgalinta ciidama la xoojiyo oo caafimaadkooda iyo daryeelkooda la xoojiyo.

Waxa kale oo aan Madaxweynaha iyo Xukuumada si gaar ah uga codsanayaa in ciidamada dagaaladii ku dhaawacmay xooga la saaro oo cisbitaalada gudaha dalka wixii wax lagaga qaban kariwaayona caafimaad dibadeed la siiyo oo miisaaniyada lagu daro oo wasaaradaha ay khusayso waxaan u sheegaynaa in arrintaasi Miisaaniyada ka soo muuqato, si dhiirigalin u noqoto oo askariga hada dagaalamayaa aanu dhiig bixin. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi** *(7min, 50sec): -* Dooddan iyo waxay ku saabsan tahay waa dood aad iyo aad u muhiima, waxay taabanaysaa amaanka iyo siyaasada wadanka labaduba qaranka muhiim u ah, marka waa inaynu niyada ku haynaa inaynu labadaas arrimood ee muhiimka aynu ka hadlayno.

Waxaan horaysiinayaa madaama labadaas arrimoodba muhiim yihiin in Goleheenu u midooba labaas arrimood tallooyinkooda, wax ka qabashadooda iyo wax ku kordhintooda, markaas uun baynu wax tari karnaa, ra'yiga waa lagu kala duwanaan karaaye laakiin hadii ay jiraan qaybsanaan iyo ra'yiyadani ku salaysnaadaan arrin hore oo dhacday ama aragti kala duwanaanshaha siyaasada axsaabta waxay noqonaysaa inaga wax qabadkeenu yaraado.

Si raxaadaan u hadlayaaye hadii raga qaar ay xagato mawaaqif hore oo ina soo maray wakhtiyo hore, waxa jira laba arrimood oo muhiima inaynu maanta ogaano oo ay tahay inaynu ku darsano, mid hore waxa weeye xaaladu xaaladihii hore way ka adagtahay, markasta oo aynu u sii dhowaanay waxaynu sii dhowaanay inay qaranimadeenii sii daciifayso waa inaynu niyada ku haynaa oo qorshaha ku darsanaa, mida labaad, waxa la yidhi nin baa nin u soo hoyday markaasuu ka seexday, dabadeedna bari dambe ayuu isna u yimi ninkii oo u soo hoyday oo ardaagiisii fadhiistay, dabadeedna, ninkii baa yidhi "war maanu ninkii heleb ahayn muxuu iigu soo hoyday oo ardaagayga u fadhiyaa' dabadeedna wuxuu ku yidhi "war adna idhaan".

Hadii ay jirto khaladaad hore oo la galay, dee maanta waxaynu baahanahay midnimo iyo inaynu xata IS-DHAANO xataa hadii ay jireen khaladaad hore si saraaxad ah ayaan u hadlayaaye. Waxaan leeyahay maanta arrinkeenii meel adag buu marayaa oo midnimo ayaynu kaga bixin karnaa, intaas waxaan leeyahay Golaha.

Waxa kale oo aan Golaha u soo jeedinayaa, madaama wakhtigaas adag lagu jiro inaynaan u badan in xukuumada waxyaabo dabaro ku ah waxyaabaha ay qaadan karto ee options-ka ah, tusaale ahaan, hadii golahani yidhaahdo dagaal yaan la qaadin, qaranimada waxyaabo badan baa lagu difaacaa sida dagaal, afka ka mid ah, saxaafada ka mid ah, marka hadii iyadoo jaaniska (option)ka kaliya u banaan yahay dagaal uu Goluhu ka

horyimaado dee waa gacan duub, marka waxaan soo jeedinayaa yaynaan gacan duub noqone aynu xukuumada kala shaqayno waxyaabaha aynu kala shaqaynayno.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan teegarayaa ra'yiyo badan oo ka mid yihiin **wada-hadalada Soomaaliya iyo Somaliland in la joojiyo**, arrintaasi waxay daah u noqotay cidii ictiraaf raadinteena is hortaagaysay oo markay is hortaagaysa waxay leedahay wada-hadal baa noo socda ee na daaya, markaa waa inaynu taas soo afjarnaayo oo muujinaa in wada-hadal socone aynu waxeena wadano iyaguna waxooda wataan, marka waxaan qabaa inay wakhtigan daruuri tahay joojinta wada-hadaladu si aynu siyaasadeena inagu mid inoo xor ah oo aanay carqalad ugu noqon, waayo markasta oo ay la doodi karo iyadoo wada-hadal socdo waxa lagu doodi kara wada-hadal baa u socde ha soo dhamaystaan wada-hadalkooda go'aamada ictiraaf raadinteena ku saabsan aynaan qaadan karayne.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa **in fadhi xidhan madaxda ay khusayso siyaasad iyo amnigu ugu yeedhno oo aynu fadhigaas xidhan la yeelano** oo ka waraysano intaynaan gudina saarin cid kale ama talaabo kale qaadan, waayo warkaynu ka helnaa noqonaya kii aynu go'aamadeena ku qaadan lahayn ee ku dhisan lahay, markaa waxaan odhan lahaa waa iyaga la horaysiiya oo madaxdaas amnigu khuseeyo fadhi xidhan ku waraysanaaa.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, in la xoojiyo dedaalada ictiraaf raadinta, waayo arrimahani waxay ku saabsan yihiin siyaasad iyo amni, marka ictiraaf raadintu waa siyaasadii.

Waxa kale oo aan xoojinayaa, tallo-qaran oo golayaasha iyo xisbiyada qaranku ku jiraan arrimahan lagu waajaho arrimahan lagu xoojiyo, iyadoo ay jireen xisbiyada in xukuumadu tallooyin waydiisay hadana waa in la sii xoojiyaa oo golayaasha iyo xisbiyada qaranka ay tallo-qaran la galaan.

Waxa kale oo aan ku darayaa, in shirkii iyo gogoshii nabada Sanaag la de-dejiyo taas oo ay aqbaleen madax-dhaqameedka reer Sanaan waa in iyadana degdeg loo de-dejiyo oo hawlaha ugu horeeya ee dawlad noqoto, maadaama ay saamayn ku leedahay, reer sanaag waxa ka socda Laascaanood ay saamayn ku leedahay. Aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Axmad Cabdi Ducaale** *(3min, 35sec): -* Shir-gudoonka, Mudanyaasha, Shaqaalaha ASC, salaam ka dib. Hadalka waxa ugu qiimo badan kan kooban, waxaan isku dayayaa inaan soo koobo hadalka oo intiisii badnayd la yidhi, wixii aan isleeyahay way ka yar dhiman yihiin baan doonayaa inaan ku daro.

Maanta sidii wax u dhaceen iyo wixii ka dhacay Gobolka Sool ku noqosho malaha in la isku canaantona maaha, waxaynu ognahay xukuumad kasta oo dalka soo martayna guul

iyo guul daro waxay dalka u keentay way ku suntanaan doontaa, tan joogta iyo mid tagtay tay noqotoba masuuliyada dalka dawladaas ay dadku soo doortaan baa ka masuul ah.

Waxaan soo jeedinayaa in qorshe cad arrintaas laga yeesho, ma qabo anigu in masuuliyiintaas loo yeedho waayo waxyanu ognahay baynu waraysanaynaa wax inaga qarsoona ma jiraan, Madaxweynaha waxaan u soo jeedinayaa inuu isugu yeedho Golayaasha qaranka iyo xisbiyada qaranka oo laga soo saaro talo cad shacab iyo cid walba oo ay khusaysaa la isla ogyahay, maanta ma joogto hebel aynu waraysano, wax ianga qarsoon ma jiraan, taladaas qaran oo madaxweynuhu qaato ayaan soo jeedinayaa.

Waxa kale oo aan leeyahay Dawlada Xamar ee waa fadhiid iyo waa itaal daran tahay qaarba leeyihiin, maata dhexdeenii bay ku jirta waxay tahayba, marka waxaan qabaa inaynu samayno sidii aynu oga hortagi lahayn oo isaga celin lahay, dhaliishoodu waxba ma tarayse tallo cad oo aynu nimankaas isaga Celino aynu la nimaadno dabadeena aynu ku dhaqano oo hirgalino.

Siyaasada arrimaha dibada, anigu waxaan qabaa dawladu saaxiibadii aynu lahayn inay saaxiibo kale ku soo darto anigu waan taageersanahay, ma jirto inaynu cid uga cararno cid kale, dawladahah caalamku waa inoo siman yihiin, siyaasadaha uun baa kala duwan, marka Xukuumadu inay saaxiibadii horena inoo hayso kuwo cusub oo inaga fogaana la hadasho waan ku taageersanahay, inaynu halkaas taagnaano maahe waa inaynu hore u soconaa. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Cali Xuseen Beegsi** *(7min, 12sec): -* Marrka hore waan idin salaamayaa, waadna mahadsan tahay Gudoomiye, arrintani waa arrin markii laga hadli lahaa joogta, qadiyada Sool bari iyo Sanaag bari waa qadiyooyin la bilaabmay markii somaliladn la unkay, maaha wax maanta dhashay, Xukuumadii soo maray qaarba sii bay ula macaamili jireen, wixii ka horeeyay xukuumadii Muuse Biixi siyaasad tabaalayn ah ayaa goboladaas lagu xukumi jiray iyo degmooyinkaas.

Markii qardoofadu inaga dhacday ee xiligii Madaxweynihii hore ee Muuse Biixi uu dagaalka qaatay hawshaasi waxay noqotay in siyaasadii hore gabi ahaanba ay is-badesho. Hadana inagoo dagaalkii ku jirna ayaa waxa dhalatay dawladii cusbayd ee Madaxweyne Cabdiraxman uu hogaaminayay, isna nabad buu qaatay, is-badelka labadaas colaada iyo nabad dhexdooda ayuu siyaasadeena maanta khaladwayni kaga jiraa,

Sidaa darteed, ma dhici karto iyadoo waddanku colaad ku jiro inaynu mar kaliya nabad iska qaadano, laakiin waxa muhiim ah gogoshii oo taala hadana abaabulkii dagaalka iyo furimihii iyo ciidankeenii la arko oo sida nabad aynu uga waramayno aynu u diyaargarawga colaada hadaynu fahmi wayno ay labadaasi is barbar yaalaan bay ahayd, laakiin may dhicin taasi.

Barigii hore Sool hawl gudaheena ah bay ahayd, laakiin hada waddamo kale ayaa dagaal inagu soo jiheeyay, arrintaasi waxay si toos ah u taabanaysaa siyaasadeena arrimaha dibada. Siyaasadeena arrimaha dibadu waa more pro-western oo Maraykan, Twain iyo waddamo kale oo carbeed baynu xidhiidh la leenahay, siyaasad kale oo bariga ah oo Shiinuhu hogaaminayo ayaa iminka Soomaaliya iyo bariga Sool ka jirta, Meesha ma dhici karto dawlad ay soo eryadeen shan kun oo Al-shabaab ay ku soo duusho waddan dhan oo shan milyan ah oo dagaalkeena u soo badheedho, laakiin anigu waxaan qaba Jananada iyo Masuuliyiint timiday inay yihiin niman raad gadanaya oo fashilkii somaliya kaga soo dhacay kaga raadgadanaya.

Sidaa darteed, xaalada maanta aynu marayno arrimaha dibada ayay aad u khusaysaaye, aynu dib u qaabayno siyaasadeena arrimaha dibada, marka waxaan soo jeedinayaa in Xukuumadu siyaasada arrimaha dibada ee ku salaysan horumarinta iyo ictiraaf raadinta ku kordhin lagu daro jinaax amniga ah maadaama iminka xaaladahaas inagu ee kordhay ay taabanayaan qaranimadeena iyo jiritaankeena.

Waddamada meeshaas danaynaynaya ee shidaal ka raadinaya Turkiga ayaa ka mid ah, halkana Turkigu qunsuliyad ama xafiis buu ku leeyahay, marka markay arrimaha amniga timaado waa in si toos ah oo aan gabasho lahayn looga hadlo taas oo kale, sidoo kale waddama jaarka ah oo kale arrimaheena waynu kala hadlaynaa, Puntland baa ka mid jaarkeena ay hawshani si toos ah u taabatay amnigeeda, inaga amnigeenay taabatay waa inaynu kala hadalnaa sidii amniga halkaas aynu isaga kaashan karno.

Dawladu waa inay si rasmiya sidii barigii hore loo furay **wada-hadalada Soomaaliya iyo Somaliland loo xidhaa** qodobkaas oo golayaasha mara joojinta wada-hadalkaasi.

**Gogosha bariga taala ee Ceergaabo** la dhigay waan soo dhowaynayaa, laakiin waa in sida ay warbaahinta u haysato arrintaasi is hubayn iyo is abaabul la arki karaana oo furimaheena ka jiraa la arkaa oo sidaas oo kale warbaahinta u haysataa, gogoshiina arrintaas dhinac socotaa, waana isu dheeli tir siyaasadeed.

**Masuuliyiin baa qaranka** ka jirta oo ku metala degmooyinkaas Sool bari iyo Sanaag bari, masuuliyiintaasi waa inay shaqeeyaan, waa in la diro iyagoo soconaya, dadka in badan oo Somaliland taageersan baa jirta, dadkaas oo go'doonsan oo degmooyinkaas Soomaaliya ku soo duushay, marka dadkaas waa in taageero la siiyo, waayo Salaadiintii waawaynayd oo kale waxan socda raali kama ah.

Degmooyinka Somaliland gacanteeda ku jirta ee Gobolka oo Caynabo ka mid tahay, waxay mudan yihiin in undergrounds loo dhiso hadii dagaaladu cuslaadaan ay xabada ka galaan. Waad mahadsan tihiin, WSC.

**Md. Axmad Yuusuf Nuur (Guruuje)** *(9min, 06sec): -* Anigu saddex qodob baan ka hadlayaa, saddexdaas qodob waxa weey mushkilada taagan.

Mudanayaal, waxa jira mushkilad wayn oo maanta qarankeena haysata oo dulaan balaadhan oo dawlada muqdisho inagu soo qaaday, duulaankaas oo ah mid noocyo badan, waxaana ka mid ah go'doomin diblomaasiyadeed, waxa ka mid ah waddankeenii oo badh ka mid ah la goostay oo lagu dhex jiro.

Habeenkii xalay waxa la seexay dastuur qodobkiisa 7aad iyo qodobka 8aad ee dastuurkaas been-beenta ah lagu qoray in Maamulkaas loo bixiyay waqooyii bari Gobolada Soo, Sanaag iyo Tog-dheer, dastuurkaas xalay baa la saxeexay, sidaa markay tahay, waxa cadaan ah in meeshaas duulaan balaadh uu inagu soo fool leeyahay Goboladeeniina in badan la sheeganayo.

Qodobka labaad ee ka hadalaya waxa weeye, noocyada duulaankan oo aan doonayo inaan wax ka yar ka iftiimiyo, Mudanayaal, hawadeenii waa la qabsaday waana la haystaa, ganacsigeenii ashkata ku socota oo sannad walba neefka xoolaha ah ee aynu caalamka u iibgayno waa la ashtakaynayaa, waxa la inagu hayaa cadaadis diblomaasiyadeed oo joogto ah, iyadoo la inoo kiraystay khubaro caalami ah oo xafiis walba ashtakadeena la taagan.

Waxa jirta, in dawlada Muqdisho samaystay khariirad ay khataraheeda ku qortay oo ay inaga dhigtay gobolka labaad ee leh ahmiyada labaad ee khatarteeda. Waxa jira gudiyo aqoonyahan ah oo madax banaan oo xukuumada Muqdisho la shaqeeya qaydiyadeenana ka soo horjeeda, waxa jira laan gaar ah oo Wasaarada Arrimaha Dibada Soomaaliya ka jirta, waxa jira gudiyo golaha wasiirada ah oo maanta Laascaanood fadhiya.

Mudanayaal, sida Xildhibaanka iga horeeyay ee Mudane Cali Beegsi sheegay in dadkeenii reer Somaliland la kala qaybiyay oo qaar ka mid ah la inagu horkeenay, maanta dadkeenii reer Somaliland ee inaga aragtida duwanaa waa la haystaa, waad ogtihiin Garaad Jaamac Garaad Cali inaanu shaqo ku lahayn waxa maanta Laascaanood ka socda oo la yidhi laguuu joojin maayo, waad ogtihiin in Suldaan Siciid Suldaan C/salaam Suldaan Maxamuud Cali Shire aanu maanta waxa halka ka socda ogayn ee la yidhi Titokers baa ku metalaya ee adigu waxba ma metashid.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, maanta dalkeenii waa qayb la qabsaday oo dawlad goboleed been ah laga dhisayo iyo qayb lagu soo socdo. Markay sidaa tahay, maxaa inala gudboon.

Somaliland maanta waxay joogta marxalad taariikhi ah, taas oo la mid tii uu joogay maraykanku oo goboladiisu u kala qaybsameen waqooyi iyo koonfur oo qaarkood gobolada doonayeen inay Maraykanka ka go'aan iyagoo dawlado shisheeye ka helayaa taageero, xaaladu way ku adkaatay oo halkaas aynu marayno bay soo gaadhay,

Madaxweynihii xiligaas oo ahaa nin aad u caqli badan wuxuu jeediyay khudbad taariikhi ah oo ilaa maanta Jaamacadaha aduunka kuliyadahooda siyaasada iyo qaanuunka lagu dhigto, wuxuuna yidhi "government of the people by the people from the people is danger" dawladu shacabka ee shacabkju soo doortay khatar bay ku jirtaa, dadku waa inay is difaacaan.

Maanta waxaan aaminsanahay Somaliland oo dadka reer Somaliland dhisteen waa lagu soo duulay, khatar bayna ku jirta, duulaan qaawan baa ina soo food saaray, waxa inoo yaala inaynu wax iska Celino, waxa kale oo inala gudbooni ma jiraan.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Somaliland imtixaano badan bay soo martay, imtixaankii kowaad wuxuu ahaa tolow Somaliland ma jiri karaysaa, waynu ka gudubnay oo waxbaynu dhisanay oo waynu jirnaa.

Waxa kale oo la yidhi mar hadii la ictiraafi waayay ma sii socon kartaa, 34 sanno ka dib waxaynu muujinay inaynu wali socono oo aynu qorsheheenii iyo qiyaasteenii ku socon. Maanta imitxaanka ina horyaal waxa weeye Somaliland ma is difaaci karaysaa oo jiritaankeeda ma difaacan karaysaa, xuduudeheeda ma difaacan karaysaa, sharafteeda ma difaacan karaysaa, marka wax ikhtiyaar ah oo aynu leenahay ma jiro markay halka joogto.

Wuxuu yidhi Abwaan Xaaji Dalaayad "galool gudhay halgool lagu gilgilay sooma qoyn karo eh, gabse wuxuu yidhaahdaa markaad godin la fuushaa, kol haday gamuurnaato oo la is garmarin waayo, waa gacanta midig uun waxay gobi u aydaaye, hadbaa inala gudbane waa inaad garawsanaantaan" aduunyadu maantoo kale way is difaacdaaye shacabka reer Somaliland inagoo ka wakil ah, inagoo dawlada Somalilad mudanayaasheedii ah waxa inala gudboon inaynu jiritaanka wadankeena iyo difaaciisa isu taagno.

Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa afar qodob:-

- In Madaxweynuhu isugu yeedho saddexda gole qaran, mar hadii uu Golihii Wasiirada isugu yeedhay waa inuu labadeena gole isugu yeedhaa oo labada gole (Wakiillada iyo Guurtida) uu khudbad taariikhiya ka horjeediyaa.
- In sida Xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen Wada-hadaladii Soomaaliya ee lugooyada ahayd waa inaynu ka baxnaa
- Waa in la sameeyo Gudi qaran oo Joogto ah, taas oo saddexda gole qaran ka kooban oo dadka u jihaysa difaaca qaranka, gobolada iyo degmooyinka dalkana marta.
- Waa inaynu samaynaa qorshe istaraatiijiyad isku xidhan oo difaac qaran ah oo bulshada in la wacyigaliyaa ugu horayso, xulufo ina taageerta oo caalami ah ku raadsano oo mid ciidan iyo mid dhaqaale leh.

Maanta wakhti badan oo inaga lumaa in aanu jirin baan u malaynayaa, hadalakayga waxaan ku soo ururinayaa hadalkii Xildhibaan Mustafe Khayreeye oo ayidayo gobolkii 55% baynu gacanta ku haynaa, marka inta aynu gobolka inta kale gacanta ku soo celinayno waa in caasimada Gobolka Sool laga dhigaa Caynabo oo ahayd magaaladii labaad ee gobolka, 1968 Gobolka Sool markii la magacaabay Laascaanood degmay ahayd, Caynabona degmay ahayd, waa in maamulkii gobolka iyo xafiisyadii Caynaba la geeyaa, caasimadii degmada Xuduna waa in loo soo raraa degmada Bohol oo xuquuqdeedii heshaa, Magaalada Ceergaabona horumarkeeda iyo difaaceeda iyana waa in la xoojiyaa. Qarankuna waa inuu qibladaas difaaca u wada jeestaa. Waad mahadsan tihiin. WSC.

**Md. Mubaarik Xuseen (Xeel-dheere)** *(2min, 38sec):-* **Bismilaahi,** Mudane Gudoomiye mudanayaasha waxa aan ka hadli doona xaladii Sool bari ama Laascaanood

Anigu waxan u arkaa shaqsiyan halkaa inuu dagaal ka soo socdo oo is habayn iyo diyaar garaw ka jiro markaa qaran ahaan waa in aan ka diyaar garawnaa is difaacna waxa la yidhi "hadaad nabada doonayso dagaal baa loo diyaar garoow" (if you want peace prepare for war), markaa inaynnu sii diyar garawno ayaa inala gudboon qaran ahaan, xukuumaduna xiligii ugu haboona ayay ka jawaabatay wanan ku taager sanahay talaabada ay qaaday, talaabo kastan oo ay qaadana wan ku taagersanahay. Waxase haboon wixii waxan keenay in aynu ogaano, dawladii hore kulmiye ee fashilantayn ayaa keentay arrintaa oo wuxuu ahaa guldaradii uu kulmiye inoo gaystay 14 kii sano ee dalka uu soo xukumayay.

Maamulka xamar ee fadhiidka ah ee fashilmay isaguna waxa uu iskuhayn waayay maamul goboleedadii hore u jiray, wuxuuna uu ka dhigan yahay islaantii tidhi xabada ii kordhiya markaa muxuu ku cusub magacaabaa kuwii hore ayuu iskuhayn kari laayaye oo Puntland iyo Jubaland ayaaba ka soo horjeeda.

Waxa kaloo an raacinayaa wada-hadalada ay xildhibanada kale yidhahdeen hala hakiyo ama hala laalo xukuumaduy way hakisay laalisna uma baahna, xeer in laga soo sarana uma baahna siyaasadu maaha (static) ama wax taagane laakin waa (dynamic) iyadoo dagal socdo oo dhiigu daadanayo ayaa lawada hadlaa, markaa waxan leeyay iyada wada-hadaladaas hakiska imka la hakiyay ee xukuumadu hakisay sidaa ha lagu hakiyo, xeer loo sameeya iyo ma joogno xiligii la is eedayn lahaa.

Xukumadana iminka muddo yar bay joogtay waanay dedaalaysaa in aynu inaguna la shaqayno oo gacmaha is-qabsano oo sidaa abaarahaba meel aynu uga soo wada jeedsano, Manta laba xaladood baa inagu furan, abaarna way inagu furantay, colaadna way inagu furanaty in la iscanaanato iyo isdhaleecayn inooma taalo laakiin in gacmaha la isqabsado oo Mudanayal, Xukuumad iyo Shacaba aynu gacmaha isqabsano ayaa inala gudboon intaasan kaga baxayaa, Aad baad u mahadsan tihiin.

**Md: Cali Jaamac Caraale (Cali Qaran)** *(5min, 11sec):-* Shir-gduoonka, Mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxafada dhamaan waxan ku salaamaya salaanta ASC, Mudane Gudoomiye iyo Mudenayaal waxa runtii doodii ilaa shalay inoo soo soctay ay ku saabsanayd deeganka Sool bari ayaan jeclaystay anguna ina aan kalmadayda ka idhaahdo ayaan jeclahay,

Inta aanan doodayda ku dhaadhicin waxan kalmad kooban ka odhanayaa Xildhibaan Guruuje oo dooddiisa shalay eray ku jiray baan rabaa in aan naqdiyo, Xildhibaanku waxa uu yidhi sida laba cadaawaa lama kala cadgoosto, taasi waxay cadayn u tahay 2023/1/8 wixii ka dhacaya Somalilad gudaheeda iyo Golaha Wakiillada dooddihii banaanada lagu qabanayay in ay kaw ka tahay inuu leeyay Xildhibaanku qaybaanu ku lahayn waxaa dhacay, waxaan leeyay Xildhibaaanka umada reer Somaliland si public ah ugu sheeg inaad qayb ka ahaydeen oo qayb ka ahayd cafisna wadiso taas intaasaan ka leeyay.

Runtii dulaanka lagu soo qaaday Sool bari waxan leeyay xukuumada hada talada haysa inaga saarimayso dhaleecayn, cambaarayn iyo hadal qudha waxaynu u baahanay in aynu si wada jir ah ficil iyo qawlba ula nimaadno oo deegaanka la soo faragaliyay ee ay soo faragalisay dawlada taagta daran ee Villa Soomaaliya ka talisaa waxay inooga baahantahay inaynu shan farood ku taagno sidii ay sheegeen Xildhibaanadii iga horeeyay, somalidu waxay yidhaahdan waxan shantaadu kaa qaban sharxi kaama qabto, markaa waxan filayaa in aynu si wada jir ah ficil ugu jawaabno.

Siyaasadeena arrimaha dibadu mudooyinkii u danbeeyay iminka wagash-wagash bay ahayd waxaad moodaa in waxooga hoos u dhac inagu yimid inagoo aad mooddo in marba marka ka danbaysa aynu luminayno dawladihii Jaarka inoo ahaa ee aynu amni iyo cududba isku tiirsanayn, markaa waxn leeyay xukumada hada talada haysaa halkaa kor ha looso qaado oo madaama oo aynu xad dheer leenahay dawlada Itoobiya oo hadii halkaa rabshadi ka dhacdo cida ugu horaysa ee dhibaatadu gaadhaysaa ay tahay jaarkena iyo dadka reer Somaliladba waxay u baahan tahay in aynu iska kaashano mushilada dabka halkaa laga hurinayo.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, waxanu la furnay **wada-hadal dawladaa taagta daran ee Soomaliya**, laba iyo tobaan sano in ku dhaw buu wada hadalkaasi socadaa waa wada-hadal ma dhalaysa golahan sidii hore aanu ugu keenay mooshinka in la joojiyo wada-hadalkaa dooda mudanayaashuna ay u badnaydn xukuumadu hadii ay ku dhiiran wayday in ay golayaasha horkeento waa in labada gole ay joojiyaan wada-hadalkaa.

Waxaan leeyahay Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, inagu gudi aynu saarno gudiddaasi haka shaqayso sidii labada gole u fadhisan lahaayen wada-hadaladaasna loo joojin lahaa.

Waxaan la qabaa Mudanaayaashi iga horeeyay in loo yeedho oo fadhi xidhan loogu yeedho Waaxaha amniga sida Wasiirka Gaashandhiga, Taliyaha Ciidamada qalabka sida,

Taliyaha Booliska iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo halkan wax iskaga waydino xaalada guud ee dalka.

Runtii Madaxwaynaha dawlada Villa Soomaaliya waxaan qabaa in uu Cancer ku yahay siyaasada geeska, Cancer ku yahay oo uu fidmo ka dhex wado dad nabad ku wada degan. aad iyo aad baad u mahad santihiin WSC.

**Md: Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)** *(7min, 8sec)*:- Mudane Gudoomiye, Mudanayaal iyo saxaafadaba iyo cidii ina dhagaysanaysaba ASC, maaha inay dawlada ka dhisan xamar ay marwalba u taagan tahay una taagnayd sidii aanay Somaliland u noqon dal jira oo ay ka hana qaado nabadgalyo iyo iiman wanagsan iyo horumarmar, mar walba wax ay u taagnayd in ay ku ahaato caqabad, in ay Somaliland xaqijiso in ay kamid noqoto dawladaha, tan manta joogtana kuwa hore ayuun bay la ehel tahay laakiin tani wax ay dheeratay in ay gudaha u soo gashay Somaliland oo ay soo gashay ciidi iyo dhulkii somalilad oo ay manta cagaha ku hayso, iyada oo adeegsanaysa wasiilad kasta oo ay ugu horayso hurinta dagaal ka dhaca Somaliland gudaheeda, taas oo ay uga jeedo inay bakhtiso sifada ay ku caano maashay somalilad intaa ay soo dhisnaydba ee ah dawlad shaqaynaysa, shacab ku kalsoon, horumar iyo tadawur ay qaadanayso oo maalinba maalinta ka dambaysa ay sare u sii kacayso.

Waxa qalbigu jabay dawladaa oo dhisaalaysiiyay maanta Somaliland weerar siyaasadeed, weerar ciidameed, hujuum ay doonayso umada Somaliland ku dhaqan ay isu xalaalayso dhiigooda iyo maalkooda iyo naftooda, markay arrintu noocaas tahay sida looga hortagayo waxa ay u qaybsamaysaa ka hortag siyaasadeed iyo ka hortag maxan ku yidhaahdaayey is abaabul oo ay labadaasuba ku intihoonayaan iska celin iyo confertation.

tan siyaasadu, qaadista wadada siyaasadu waa mid aad iyo aad muhiim inoogu ah in aynu qaadno si aynu u tusno caalamka iyo cidi kasta ee Somaliland danaynaysaba in xukumada aan awooda u lahay in ay iyadii is xukunto in ay halkan u timi in nabada qudha ee ka jirta somali dhulka ay dagto in ay gubto oo ay baabi'iso oo aynu ku gaadhsino fikirkaa isaga caalamka language ka calamku ay fahmayaan ee saxdaa.

In aynu ogaysino caalamka in istiqraarka iyo nabadgalyada iyo daganaanshaha ka jira Somaliland ay tahay mid u dana dawladahaa jaarka iyo dawladaha caalamka iyo marin biyood kaa barakaysan ee Ilaahay SWT inagu galaday, fahamsino caalamka in ay iskeen barbar taagan oo isku keen barbar taagan sidii dawladaa Xasan Sheikh hogaminayo ee dhiigeena xalaashatay ay candhufteeda dib u liqdo, markastaba oo dariiqa horumarineed gude iyo dibadba ee Somaliland ka dhacdaa waxa uu ka xanaajinayaa Muqdisho, waana xasad, walxasadu laaya yuflax abadan.

Sidaa markay tahayn gudaheena waxaynu u baahanay in shacabkeenu uu ogaado in ay taxadiga iminka aynu galnay dhaqan kala yahay oo cida is dilaysaa Somaliland tahay cida

dhigoodu isku qabanayaa Somaliland tahay, cida la isku adeegsanaya Somaliland tahay, muwadiniinta dhimanayaa Somaliland yihiin, oo ay adeegsanayaan qaar reer Somaliland ah iyo qaar dabada ka saogalay oo koonfurta ka yimid iyo xamar oo donaya in ay xaqiijiyaan dulaynta iyo dacaska iyo baaba Somaliland si ay midhah ka soo baxa iyagu ay u gurtaan oo dhunkaasha ay u gurtaan.

Sidaa awgeed, waxaa muhiim ah in dadka dagan Sool bari iyo Somaliland inteeda kaleba quluubteeda la isku soo jeediyo oo la is fahamsiiyo, noloshu in ay tahay in ay ku wada nooladaan amni iyo amaan.

1981kii ayaa angai Laascaanod iigu horaysay, waxaa iigu xigtay 2002 waxay isku ahaayeen wax aynan shaqo iyo shuqultona kulahayn nolosha ka jirtay 2002 magaalada la yidhado Laascaanood sinaba ugama jirto maanta iyada iyo intiikale ee tuulooyin ahaa ee ka baxsana, daka reer Laasacanood dawladeena iyo shacabkeenaba waa in ay ogsoonaadaan levelkaa taxadiga ah ee aynu ku jirno ee inooga baahan in aynu u midawno oo aynu kaga hortagno wax kasta oo aynu kaga hortagi karnaba, hadal ha ahaato, ficil ha ahaato, wajigay doontaba ha lahaato, maanta waa la inagu soo duulay waa in aynu inaguna aynu ahaana levelka taxadigee inagu soo duulay. WSC.

**Md. Xirsi Cabdilaahi Xirsi** *(9min, 08sec):-* Mahadsanid Gudoomiye, doodda inoo socota maanta iyo shalay waxaan u arkaa dood muhiima ah, dooda lagama marmaan u ah xalada dalku ku jiro. waxa la yidhaahdaa taarikhadu waa shayga ugu cajiibsan ee qofka wax bara qofka aan taarikhda dhow iyo tiisa foga soo arkhisana horena umaha socon karo, talabo ma qaadi karo.

Runtii Mudanayaasha waan ku raacsanahay soo tabatay taarikhada Somaliland soo martay saddexdii sanno ee ugu dambeeyey iyo wixii ka horeeyeyba.  Xildhibaan Sheikh Siciid waxaan ku raacsanahy 2022kii Laascanood waxay gaadhay meel aanay waligeed gaadhin, waxay gaadhay horumar, waxay gaadhay dawladanimo, waxay gaadhay amaan, waxay gaadhay heer ay la jaanqado magalooyinka ugu waa weyn ee Somaliland iyo dhulka ay somalidu dagtaba.

Waxa laakiin ka xumahay wakhtigaa saddex sanno ka hor lagu soo qaday dagaalka qaawan, dagaalkaas oo looga dan lahaa in Somaliland lagu mija xaabiyo, in Somaliland lagu baa'biyo, dagaal kaasi muu ahayn mid ay wadagaleen shacab reer Somaliland ah iyo dawladoodi ee wuxuu ahaa dagaal aad loo diyaariyey. dagaal sanado badan la diyaarinayy, dagaal lagu talogalay inuu ku dhamaado halka ay maanta dhexdeenu marayso, dabadeeduna tahay in Somaliland maanta la baabiyo.

Runtii dagaalkaasi oo ciddo badani ku jirtay dal iyo dibadaba, waxa ka mid ahaa Gudoomiyihii hore ee golaheena ee ninkii siyaasada ku caan baxay ee yidhi waxaan ahay munaafaq oo waxaan ku dhaartay kitaab aanan aamisanayan, waxaanan u dhaartay qaran aanan aamisanayn, waana qeyba ka mida ah taarikhada madow ee golaheenani leeyahay inaynu ogolaano inagu inuu hor fadhisato, inuu emblem-ka Aomaliland waraaqo ku qorto, inaynu inagu ogolaanay inuu sannado ina hor fadhiyo, inagu maynaan ogayn maalintaa dareenka ku jiray ee wuxuu ahaa dareenka uu hada qiratay, waxaanan isa leeyahay saaxiibo badan oo uu dhow oo uu lahaa wax way ka dareensanaayen.

Somaliland dagaalka lagu soo qaday wuxuu soo maray maraaxilo farabadan, waxaana uu ahaa mida ku soo dhamaday inaynu gabi ahaanba ka soo baxan bariga Sool ama Laascanoodba, isma lihi waxa uu ahaa dagaal uu ciidankeeni ugu awood la'aan ugu, uu ugu jabay isaga oo aan is difaaci karayan, laakiin waxa uu ahaa dagaal aynu u jabnay isa bahayasi wayn oo Somaliland isugu imi iyo arrimo siyaasadeed oo dhexdeena yaalay. Taariikhda waxaan u soo qaadayaa maaha in diba loo soo faqo, laakiin waa in waxa laga barato.

Waxaan runtii ku faraxsanahay in maanta Somaliland ka nasiiba badan tahay maalintaa oo maanta mucaarid iyo muxaafidaba u diyaarasan tahay in maanta dalkeeda iyo dadkeda aynu difaacno, Madaxweynaha Somaliland aynu garab isa taagno cidina anay uga hadhayan hadii uu ujeesato difaaca dalka, kaasi oo ah waajibka kowad ee saran.

Runtii waxaan jeclahay inaan yara taabato qodobo dhawara oo dhacay dhawaan, taasi oo keenatay dooddeena maanta inkastoo ay tahay habasan, dalkeena waxa soo galay Raysal Wasaraha Soomaliya, dalkeena waxa dagaal qawan lagu soo qaday bariga Sanaag, iyadoo laga soo gudabay bariga Sool, hadana dhawaan waxa dagaal lagu soo qaaday bariga Sanaag. Iyadoo anaan jecelayn inan ninkaa magaciisa ku noqnoqndo laakiin waxa uu ku faanayey wixii an Laascanood ka samaynay ayaan cerigaabo ka samaynayaa.

Hadana waa saaxiib dhaw oo raga badan la saaxiiba. Runtii mudanayaal waxa sagaalkii cisho ee u danbeyey laascanood ka socday sameyan dawalada ku kooban laba dagmo dawlada oo la leeyahay waxa xad u ah burco, dawladaas oo aynu arkaynay ninka gudoomiyaha ka ah ee hor adhiya ciidamo la dabaldagaya oo ciidanka ku heesaya waxaan u soconaa Burco iyo Barbara.

Mudanayaal maanta golaheenani kuma dhawaqayo dagaal, dawladeena nabada jecel ee dalka inoo haysa, ee gudida nabada inoogu magacowday ee gogosha nabada dhigtay ,ma lihin dagaalan, laakiin waxaan leenahay awalaba waada ku jirteen dagaalka, Somaliland way ku jirtay dagaalka awalba ee haduu Madaxweyane Cirro badalay Madaxweyane Muuse waa uu ka dhaxalay arrintaas.

Waxaan leeyahay Somaliland dagaal qawan ayaa ku socda. Madaxweyne Cirrona waxa uu ku qasban yahay inuu maro halkii ay mareen ragii ka horeyey ama uu kursiga u baneeyo cidii difaaci lahayda qaran ka.

Mudanayaal Somaliland intii uu ku socday dagaal kasi waxan isleeyahay waxa ay gadhay halkii ugu saraysay ee arrimaha dibada. Oo waxa uu madaxweyne muuse heshiid ku meel gadha la galay raysal wasaraha itoobiya ama waxa aynu unaqaano (MOU). Intii uu madaxweyana heena cusubi xilka la wareegay waxa uu wasiir kiisa arrimaha dibadu inagu idhi waxa (MOU) garan maayo meelu yalana garan maayo. Runtii waxaan jeclaa madaxweyanuhu inuu mar shacab kiisa usheego (MOU) uu ka dhaxlay Madaxweyne muuse biixi halka uu manta joogo, oo marka  aynu (MOU) u doonaney inaynu helano sarayan dawladeed ama qaran nimadeedi oo buxsanta manta way inoo talaa oo waa in laga daba tagaa Hadal kaygu manta waa kaa.

Runtii waxa uu madax weynuhu dhawaan ugu baxay safar dalka Qatar, wasiiraka arrimaha dibada ee Soomaaliya waxa uu yidhi Qatar waxa yaala wada hadaladii Somaliland iyo Soomaaliya halkaa ayeyna ka furmaysaa, hadal uu madaxweynuhu ka horey siiyeyna waxa uu yidhi afart iyo sodon sano xidhanaa (34)   Albaaba xidhanaa ayaan hada soo furay, hadaba waxa aynu ubahanahay inaynu laba daas isa waa fajino, dawlada Soomaaliya ee inala dagalamaysa ee ana dagal keeda qarsan awalaba inala dagaala maysay, maxay inoo soo biirinaysaa inaynu dalka qatar manta ka ogolaano  wada hadalo dawlada goboleedana inoogu dhawaqdo mudane gudoomiye waxa kow ka ah difaca qaran kan inan jarano wada hadalada Somaliland iyo Soomaaliya , dadweyanaha dibadu badanaa waxa ay yidhahdaan wax walba oo Soomaaliyalnd loo qaban lahaa , waxa hor tagan Soomaaliya oo tidhahda waxa noo socda wada hadalo ee na suga, wada hadalnaana waa heshiyaa.

Mudane Gudoomiye waajibaka Golaheena qaran ee na inaga saran ama aynu inagu gudano dhamaad ka dooddan, inaynu qaraar ka soo sarano, inaynu la fadhiisano golahan jaar keena ee aan inoo jirin 20 mitir waxa ka badan, bari ama saadanbana aynu  xidhano wada-hadalada Somaliland iyo Soomaaliya, ma aaminsani in laga sugo xaga xukuumada oo iyagu go'aan koodi soo saray, golaha wasiirada joojiyeen wada-hadaladii ee waxa dhiman tii golayaasha.

Mudane Gudoomiye waxa aynu jecelnahay inaynu aad u dhiirigalino ciidamadeena qalabka sida, Madaxweynaha waan ku dhiirigalinaya, waana ku tageerasanahay inuu qarameyey ciidamadii madaniga ahaa iyadoo asn isleeyahay ciidamadaa marka uu u dhaamado tababarku in lagu celiyo goobahoodi, waxaynu markii hore u sameysanay inay ka qeyba noqodaan difaaca qaranka ee maaha inay difaca ka galan meelo anay markii hore difaca qaranka kaga jirin, qof walbaba isaga kaa yaqana dhulkiisa, markaa waa in lagu celiyaa halkoodi.

Waxaan ku tageera sanahy Xildhibaan khayreeye in la xoojiyo deeganaka Sool inta hadhay oo lagu xoojiyo kabkii 2% ahaa ee lagu bixin jiray gobolada bariga, **in** la xoojiyo Ciidamada qaranka, in la xoojiyo deegaanada ay joogan ciidamada qaranku, runtii waxaan hore u soo boqday dhulkii ay ciidamada madaniga ahi kaga jireen difaca qaranka, waa dhul ay baahi wayni ka jirato, waxa aan arkayey dawlada oo leh waxa aan dhameysa tiraynaa wadadii ay u bahnayeen een isku xidhaysay dhulkooda, waxaan jecelaa in wadadaa sideeda loo dhameysatiro oo anay noqon faan kaliya oo la helo wadadaas oo dhameysa tiran.

Waxaan soo jeedinayaa in loo sameyo dhakhaatir, in loo sameyo dhul ay ka gali karan difaca qaran kooda, waxaan doodeyda ku soo gabagabeynayaa, Mudane Gudoomiye aniga oo taagersan mudanayaashi iga horeyey **in loo yeedho wasirka gashaandhiga iyo taliyaha ciidanka qaranka** oo ay halkan golaha iyo shacabka uga sheegan wixii qorshe ee u yaala wixii sirana ay golaha gaar ugu sheegan wixii furana xaqabay uleeyihiin inay shacabkoodu dhirigaliyaan una sheegana talaaboyinka uu qarankani uu qadayo.

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** *(10min, 01sec):-* Waxaan salaamaya Shir-gudoonka, Xildhibanada iyo bahada saxaafada, waxaan doonayaa inaan dhawar qodob ka hadalo, waxaan soo jeedinayaa oo ana jecelahay inan ka hadalo sida aynu la wada socono Somaliland 35 sanno ayaynu galaynaa intii ayanu la soo noqonay xoriyadeeni, 35 sanno ee Somaliland jiratay waxa aynu ka hadli jiranay ama madaxda Somaliland dhaqan ka dhigatay, walaalahayaga Soomaaliya, walaala hayaga Soomaaliya ma muuqato walaalo halkaa inoogu maqa,n mana jiraan xaqiiqatan, waxaan aad iyo aad uga soo hor jeeda kalmadaa ma jiro wax Somaliya inaga dhaxeeya oo aan inaga dhaxayan Itoobiya, majiro wax Somaliya inaga dhaxeeya oo aan Djabuti inaga dhaxayan, ma jiro wax inaga dhaxeya Somaliya, marka laga imado waxaan ahayn luuqada inaga dhaxaysa oo aan inaga dhaxeyan wadamada aynu jaarka nahay ee sida Yeman oo kale.

Waxa aad mooda wakhtigii ugu dambeyey marka laga soo bilaabo 2017kii xiligii uu Madaxweyne Muuse Biixi ku guleysatay talada dalka, isagoo aan lix bilood joogin ayey Somaliya la wareegatay hawadii Somaliland, intii maalintaa ka danbeysay Soomaaliya waxa ay inagu haysaa faragalin joogata ah oo anay ka nasan habeen iyo maalinba, oo ay habeen iyo malinba u tagan yihiin. Labadii Madaxweyne ee kala danbeeyey ee Soomaaliya soo maray waxa ay inagu hayeen dagaal qawan oo ay inaga inala galeen, iyaga oo aan maamulin xaafada kaliya oo ka mida xamar gudaheeda.

Waxaan qabaa xaqiiqatan ay nimankaasi cadawadeena cadeysateen, inay siyaasadii arrimaha dibada inagaga adkaadeen, tii arrimaha gudahana inanaga adaakadeen, waayo waxa aynu maanta jooganaa Somaliland oo aynu u dharaney ka Baarlamaan ahaan oo

dastuurku in siinayo iyo waxa ay manta tahay la yaqaano oo aynu inagu u dharaney inagu inaynu u nahayn baarlamaan oo dawlada labaad ka dhisan tahay. Dawlada labaad ha dhisanaato dawlada kasta dadkeedu mucaarad bay noqdaan, haday doonaan way dagaalamaan cid dabadeed ma soo gacangaliso, dawladuhu marakay gacan dibadeed soo galayaso go'aan bay qataan.

Waxa aad mooda in doorkii aan la hayan xukumada ahaan ee arrintaa ku saabasanaa ada wali uu gabis yahay, aad iyo aad baan ugu kalsoonahay Madaxweyne Cabdirahmaan iyo xukumadiisabam aad baan ugu kalsoonahay siyaasada qabow ee uu wado ee nabadoonka ah inay wax badan saamaxayso, laakiin waxaad moodo in wax badan maqan yihiin, aad baan ugu mahada naqayaa waan aaminsanahay, waan ku tageerayaa wax badan inuu qaban karayo, in arrintaasi ayna marnaba ka baxsaneyan niyadiisa oo uu ku hayo, hadana waxa aan leeyahay hadii ' fooli timado gudo qarsiimo reeban'.

Dawladuhu si hoosena way u shaqeeyan si hoosana way u shaqeeyaan, waxa aan aamisanahay oo an soo jeedinayaa in wakhtisiino, **sidoo kale aynu u yeedhano madaxda ay khusayso arrintani wasiirka arimaha gudaha loo yeedho si uu arrintan uga waramo oo fadhi xidhan loogu yeedho,taas waan soo jeedinayaa,waxaan** jecelahay oo soo qato arrinta oo ana secan gareeyo.

Arrinta wada-hadalada Somaliland iyo Soomaaliya oo xildhibaano badan ka hadaleen waan seconmentgaraynayaa. Arrintaa wada-hadalada Somaliland iyo Soomaaliya inaanu hore guul u keenin dibna aanay u keeneyan wax alaale iyo wax uu inagag maqan yahayna aanu jirin, waxaan soo jeedinayaa in labada gole qaraar ka soo saaran oo in Somaliya lala hadlaa ay danbi tahay qodobkana halkasan dhigayaa.

Waxaan soo jeedinayaa marka laga hadlayo arrinta Somaliland inaynu dhaba ka hadlano, qarankan waxa halkaa dhigay masuul aad moodo inaanu xilkiisa garaneyan, ka gole ahaan waxa aad mooda inaynu qeyba ka nahay, waad ogtihiin maanta dalkeena Abaar baahsan baa ka jirta, colaadaa ka jira meel, anaay waligeed Somaliland gaadhin bay maraysaa, waxa ka jira wax la yidhaahdo sixirbarar oo aad moodaa in aanay cidina ka hadal, waayo war wadankani maaha maraykan, waxaan soo jeedinayaa oo aan doonayaa inaad ka gole ahaan ila qadataan inaynu diba u furno xeerkii baananka

Somaliland waxa haysta culaysa farabadan oo isasaaran oo isabarakan oo mid ahayna oo laba ahayn, waajib baa inaga saaran waa masuuliyadeeni inaynu ka hadalano, waa masuuliyadeeni inay dawladu wax ka qabato.

Arrinataa xeerka baananka inaynu furnaa waa waajib lacagta dollarka ah ee dibadaha laga soo dirayo ee dadka dolar lagu siinayo, oo kii is yidhaahda kiish soo iibaso lagu odhanyo kii danyarata ahaa dollar keen, hadaad is tidhaa jamacada fii ka bixi lagu odhanyo dollar keen.

Waxaan soo jeedinayaa in wax laga badalo xeerka baananka, lacagta dibadaha laga soo dirayana lagu shubo bangiga dhexe, sidoo kalena lacagta wadankani uu leeyahay wax lagu iibasado oo wax lagu kala qaato ayaan soo jeedinayaa oo aan Madaxweyanaha qaranka u soo jeedinayaa, ka gole ahaan waxaan inoo jeedinayaa inasd ila qadataan oo secondment-gareysaan oo ila qadataan in lacagtaa dollarka laga saaro meesha ee suuqa dhex maraysa, waayo manihin maraykan mananihin gobol maraykana ka tirsan, waayo waxa aynu nahay Somaliland, waayo waa inaynu ku adkaano Somalilandnimadeena oo aynu meel marino, arrinta sixirbararka ee in haysataa waa aafo qaranka haysata, waa aafo ka daran colaada in haysta, colaada ninbaa ku dhintoo waa la dhaafa, laakiin sixirbarara ku waxba ma dhaafo.

Waxaan soo dhaweynayaa oo aan tageerayaa xildhibaandii doododi, waxaan tageerayaa arrinta sool bari waa sool. Sool waa la soo gacangaliyey, cida soo gacangalisayna waynu ognahay oo arkaynaa, sool maaha inay halkooda dawlada ka dhigataan ee halka loo soo socdaa waynu garanaynaa halka loo soo socdo 'nin ragana wuu garanayaa doqona loo sheegi mayo' arrinta meesha talaa waxa weeye oo aan ugu baaqaynaa bulshada waxa weeye, waxaan ugu baqaynaa dawlada la wadagaynaa in ay u diyaara garooban dagaal, maaha inaynu weerer qaadayno, maaha inaynu cida ku duulayano, masnta ceebay inagu tahay in Laascanood laga sheegato Togdheer bayanu leenahay, ceebay inagu tahay in la yidhaa waxa aynu leenahay ilaa Barbara oo la sheegato oo aanay qarsanin.

Waliba waxa aan u soo jeedinayaa labada gole oo aan hadal kayga ku darayaa shalay xukumada baa talada haysay oo dalka ka talinaysay, maanta Xildhibaanda golaha ka tirsan inamada yar yar oo youtubers hadaladoodi ayay soo qaatan oo ay ku dhaleeceyan xukumada jirta maanta ceebay ku tahay, waxaan qabaa xukumadii hore iyo Xildhibaanda waxa ay yihiin waayo arag maanta wax badan bay ogyihiin waxay qaranka u tareen iyo waxa ay u qabteena way ogayihiin, waxaan qabaa inay jaanis siyeen xukumada oo ay la shaqeeyan waliba oo isbarbar taagaan, waayo talada dalkana way wareejiyen way ku mahadasan yihiin waliba, jaanisa ha siiyana hana u diyaarngarooban difaaca dalka sidii shalayba loagala shaqeynayey, waa inynaan u muuqan ka gole ahaan laba team oo isa haysta, ceebay inagu tahay laba group, wixii xalay dhacay iyo wixii maanta dhacay inaynu u kala hadalano, war raga waxa la yidhaa wuxu ku kala duwan yahay wax maanta dhacay iyo waxa bari dhacya wax ka qeyba sigooda ayaa shayga raga ah lagu kala saara, waxaan idin sheegayaa hadii shaygii shalay toole in hortaagnado xigatoy hore u socon mayno saaxiibayaal hore u socon mayano, waxaan qabaa wixii shalay dhacay inynu hore uga socono oo waxa bari toole u socono.

Waxaan ku soo ururinayaa oo aan kaga tagayaa qoladan xisbiga waddani ee talada dalka gacanta ku haysa iyo hogaamiyaha qaranka mid koodna loo baqimaayo, waxaan qabaa in meel wanaagsan wax loo wado, waxaan qaba in jaanisa la siiyo, waxaan kaga tagayaa

Xildhibaano maanta ma taagna Kulmiye, Waddani, ma taagna UCID ee waxaan leeyahay maanta dalka waa lagu soo duulay. duulankaa qaban ee dalka aynu isabarbar taagno, xukumadeenana aynu la shaqeyno oo isabarbar taagano.

Hal baaq baan ku darayaa oo aan usoo jeedinayo tijaarta wadanka, waan oganahay dalkani waxa uu ku shaqeeya cashuurta yar ee dadka laga qaado, hadana ganacsatadeena iyo tujaarteena ma jiro mid si fiican u bixiya cashuurta dhabta ah ee ku waajibatay, bilaahi calaykum waxa an idiin soo jeedinayaa hadaydaan wax kale natarayan inaad ganacsigiina cashuurta ku waajibatay si fiican u bixisaan oo aad intaa isku barbar taagtaan.

**Md. Jaamac Abokor Dube** *(3min, 39sec):-* Bismilaahi Raxamaani Raxiim, Shir-gudoonka golaha, xilddhibanada, shaqaalaha, saxaafada, shacabwaynaha reer Somaliland ASC, inta aanan hadal kale galin Xildhibaan Xuseen waan **secondment-**gareyanayaa inaga iyo intaa ka timi gobolada sool iyo sanaag iyo bari. Qoladan reer Boorama iyo reer Maroodi-jeexana waxa aan leeyahay bi'waaye dhawr iyo sodonkaa sanno goluhu halkan buu daganaaye war bal saddex malmood halkaa bariga nala soo daga, aad buu u mahadasan yahay Xildhibanku.

Sool bari xaladeeda anigu dood badan kama galayo, waayo xogbaynu u bahanahay, xogtaa aynu u baahanahayna xukuumada ayaynu ka sugaynaa. Waxaan anigu soo jeedin lahaa aynu u yeedhano cida ay xaaladu khuseyaso, Wasiirka Gashaanadhiga ayaynu u bahanahay Taliyaha sirdoonka ayaynu u baahanahay iyo cidii kale ay hawshaas qayba ka ah, fadhi xidhan ayayanu u bahaanahay inay inoogu waramaan, dabadeedana ay wixii aynu ku kordhinayano aynu ku kordhino, waliba waxaan jeclaan lahaa in imaatin kooda labada gole laga dhigo oo inaga oo labada gole ah iyaga is waraysano dabadeedana markaa aynu waxaa imika akhrinayno oo dhan si ay u fuliyaan wixii fulin u bahan ileen inagu fulin malihini halkaa ka bilowano.

dooda han kalena yagu laftarakooda waa dantiiye marka laga hadlayo sixir bararka iyo amaniga iyo waxaas odhan way is khuseeyan.

Amniga eraygaas ayaa aniga ku darsanayaa oo ii khuseeya waxa aynu u bahanahay in culeysa la saaro oo xukumada laga la shaqeeyo oo arrinta amniga gudaha aynu u gurmano intaynaan horta Soolba la gaadhin, halkanaba imika dilalkii inagu bateen Hargaysada aynu jognee arrintaa laftar keeda ayaa loo baahanyahay inynu dawlada ka tagerano oo shacabka ayaa nabadagalayada qaybta u badan kagaysan jiray, shacabka in la abaabulo oo la xasuusiyo hadii nabadagalayadu inaga xumaato noloshaa inaga xumaanaysa.

Markaa waxaan shacaba weynaha reer Somaliland iyo qof kasta oo nabada iyo samanta jecel u soo jeedinayaa inynu arrimahan oo kale aynu u midawano aad iyo aad aynu culeeys u sarano oo bilayska lagu gacansiiyo oo xogta la bixiyo oo xogta la soo siiyo, qof wax dilay iyo qof doonaya inuu wax dilo midna la qarin, waayo qofka wax dilayaa barina

adiga ayuu ku dilayaa markaa intaa ayaan ku darayaa. Aad iyo aad ayaada u mahad santihiin.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed** (8mnt, 20sec):- Bismilahi Rahmani Raxiim, Gudoomiyaha sharfta leh iyo mudanayaasha waxaan leeyahay Asalaamu calaykum.

Marka koobaad waxa aan taageero u muujinayaa baaqii ay xukuumada JSL ka soo saartay arinkaa Sool bari socda iyo faragelinta qaawan ee Soomaaliya ay ku hayso Jamhuuriyada Somaliland, waxaan sidoo kale codkayga taageero ku darayaa xildhibaanadii maanta ilaa shalay dooda ka qayb galay gaar ahaan xildhibaanadii soo jeediyay in difaaca qaranka la adkeeyo ciidanka qaranka maalgashi iyo investment cusub lagu sameeyo aad baa u taageersanahay qodobkaas, waxa aan sidoo kale codkayga taageero ku darayaa xildhibaanadii doodooda ku daray in diplomacy-ga la xoojiyo oo dawlada Soomaaliya caalamka oo dhan farta loogu fiiqo in ay qas ka wado geeska Africa in ay hubaysnayso falaago  iyo argagaxiso oo ay daganaasho daro ka wado in qodobkaa diplomacy-ga iyo gaadhsiinta beesha caalamka dhibaatada ay Soomaaliya wado in si xirfadaysan oo cilmiyaysan loo gaadhsiiyo xildhibaanadii sidaa dooda u dhigayna aad baa u soo dhawaynayaa.

Marka aan intaa ka imaado bariga sool iyo bariga sanaag waxa ay in mudo ahba ama mudo aad u dheerba ay ahaayeen gol jilic ay Somaliland leedahay oo cadawga Somaliland inta badan isku dayo inuu ka soo galo waxaan ognahay markii la aasaasay maamulka Puntland 1998-dii meelihii markiiba ay ka soo galeen Somaliland oo ay sheegteen waxa ka mid degmooyinkaa maantaba dawlada federalka ee xamar ka dhisani ay sheegtay in ay maamul u dhistay.

Waxa nasiib wanaag ah core-ka Somaliland inuu xoogan yahay, Gobolada iyo degmooyinka galbeed ka xiga intaa maantaba intaa Soomaaliya ay ku soo duushay oo qiyasas la'aan aan isleeyahay 85% tirada dadka Somaliland intaas bay ku nool yahiin dalka wixii galbeed ka xiga meeshaa la leeyahay maamul baa loo dhisayaa la leeyay wey isku duuban yahiin wey xoogantahay aragtida Somaliland-na wey ku xoogantahay wey ka talisaa shacabkeeduna wey aaminsanyahiin qaranimada Somaliland.

Waa arin aad iyo aad loogu farxo in core- uu maanta midaysanyahay oo qaranimada Somaliland ku midaysanyay diyaarna u yahay inuu qaranka difaaco.

Difaaca koobaad ee Somaliland leedahay maaha ciidanka balse waa shacabkeeda, shacabka maanta frontier-ka cusub ee bilaabay ku nool waxa ka mid ah degmooyinka Qorilugud, Caynaba, Garadag, Ceelafweyn iyo Ceerigaabo.

Degmooyinkaasi maanta waxa ay u nugul yahiin duulankan xamar laga soo abaabulayo ee Somaliland lagu beegsanayo; maxaa inagu waajiba ah ka Gole ahaan iyo ka Qaran ahaanba.

Waxa inagu waajib ah inaynu degmooyinkaa taageero joogto ah oo ka badan intii aynu hore u siin jirnay aynu la garab taagnaano, waxa aan mar labaad taagerayaa doodahii xildhibaanadii iga horeeyay ay soo jeediyeen ee odhanayay Lacagtii kabkii 2% miisanayda ahaa in si toos ah degmooyinkaa loo galiyo tiiyoo aan security la galinayayn oo aan meel kale la galinayan ee toos loo galiyo arimaha kaabayaasha dhaqaalaha ee degmooyinkaa shacabkeedu ay u baahanyahiin.

Waxaa aan soo jeedinayaa in gurmadka abaaraha ee hadaba socda laga bilaabo degmooyinkaa cidhifka ku yaala u nugul u jilicsan duulankaa Soomaaliya ay Somaliland ku soo qaaday.

Waxa aan soo jeedinayaa kaabayaasha dhaqaalaha ee ay ugu horeeyaan Ceelasha, dhaamamka iyo baliyada; rugaha caafimaadka iyo rugaha waxbarashada dhamaantood in sida ugu dhakhsaha badan leh degmooyinkaa loo gaadhsiiyo.

Sida aan hore u sheegay difaaca qarankani leeyahay waa shacabkiisa hadii shacabka halkaa ku nool la soo baro kaciyo oo aynu garab istaagi weyno Somaliland ducfi bay dareemaysaa, hadii shacbigaa frontier-ka cusub jooga u hiilino oo taageerno oo garab istaagnana Somaliland-na wey xooganaysaa markaa qodobkaasi in National policy cusub oo aynu qaadanayay uu ahaado ayaan soo jeedinayaa.

Qodobka labaad runtii waxa xildhibaanada halkan fadhida aan aad uga aragti duwanahay fikir golahan marar badan oo horena lagaga celceliyay maanta iyo shalayna laga hadlay, fikirka odhanaya albaabka dublamaasiyada ay laabno oo aynu si joogto ah oo xeer ah oo goloyaasha maray uga baxno ama xidhno in wada hadal lalal gali karo Soomaaliya fikirkaasi ilama ah inuu yahay fikir sax ah in wada hadalada la joojiyo ama la hakiyo waa sax sida hadaba jirta ee xukuumadan hada jirtaa ay u joojisay iyo dabayaaqadii xukuumadii hore ay u joojisay waa sax qodobkaasi laakiin in albaabkaa diblamaasiyada si joogto ah oo joojiyo ilama aha in danta qarankan ay ku jirto; cidi inoogu garaabi mayso beesha caalamka iyo cid kasta cidna inoogu garaabi mayso inaynu albaabka dumlamaasiyadeed aynu si joogto ah oo aan ka soo noqosho lahayn aynu u xidhno, cidaan gar lahayn oo aan doodeeda meel iska dhigi karahayn oo aanay doodeedu sax ahayn baa ka warwareegta inay doodeeda banaanka keentoy wada hadal gasho, waxay ila tahay inay sax tahay in ay Somaliland mar walba diyaar u ahaato inay wada hadal gasho marka la helo dawlad sax ah oo xamar ka dhisan oo diyaar u ah inay Somaliland wadahal micno leh oo lagu kala guranayo ay la gasho markaa inay dawlad kasta tan hada jirta iyo tu kastoo ka danbeysaba

uu albaabkasi u furanyahay oo aynaan inagu caqabad ku noqon iyo xadhig aynaan ku noqon waxay ila tahay danta qaranka ayaa ku jirta.

Waxa aan soo jeedinayaa in midnimada aynu ka shaqayno, Somaliland cadawgeedu waxa uu kaga guulaysan karaa marka iyada la iska horkeeno shacabkeeda la iska horkeene iyada buuq la galiyo waxyaabahan yar yar ee maalmahan socday waxa aynu u baahanay inaynu aad u xakamayno, horta masuuliyada koobaad xukuumada ayay saarantahay, xukuumadu inay aad uga feejignaato ayaa la rabaa waxyaabaha abuuri kara iskhilaaf bulsho sidoo kale, xisbiyada mucaaridka masuuliyad baa saaran goleyaasha aynu inagu kamid nahayna masuuliyad baa dhamaanteen inaga saaran xoojinta iyo midnimada shacabka JSL. Waan ka baxay inahaa baan ku soo gababayeeyay waana mahadsantahiin, wa salaamu calaykum.

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax)** {6mnt, 41sec}:- Bismilah Rahmani Raxiim, Ilaahay baa mahad leh, waxaan aad u salaamayaa shirgudoonka iyo mudanayaasha sharafta leh ilaa shalay xaaladahan aadka isku barkan iyo mashaqooyinka is dul huwan ee sool bari ka soo cusboonaaday ka doodayay; waxaan jeclahay aragtidayda inaan ku ladho oo aan ku xoojiyo fikirkaa mudanayaashii hore oo aan aaminsanahay doodani inay tahay dood ka turjumaysa xaalada uu dalku marayo mudanayaashuna waajibaadkooda shaqo ay gudanayaan.

Mudanayaal umadaha dhibkastoo ku yimaada wixii gaadhay ee sababay bay si dag dag ah isku waydiiyaan inagu se dhibaatada dhacday maxsuulkeeda maynu ku war helaa oo weynu ku kala qaybsanaa markaa mushkilada laascaanood markii ay jirtay golahu waatii waajibaadkiisa uu gudan waayay dhexdeedana maanta yooyoontan inaan kagalo oo doodeena loo arko inagoo kala xisbiyo ah aynu isku riixriixayno waxaan jeclahay in aragtida fikirka halkaa laga koriyo waayo mawduucani waxa weeyaan maslaxad qaran.

Dooda ku saabsan sool bari hadaan gudo galo dadka reer sool Somaliland sideeda banaanba shacabkeeda, dawladeeda, xukuumadeeda, wax garadkeeda, dhalinayaradeeda iyo waayeelkeeda waxay ku doodi jireen oo ay Somaliland ku doodaysaa in xuduuda ay la mid tahay xuduuda dalalka africanka ahi ay dalal ku yahiin,

Halka dadka reer laascaanoodna ay ku doodayayaan oo ay in ay deeganadooda iyagu leeyahiin oo ay ka laabteen heshiiskii bulsho ee ay Somaliland kaga midka ahaayeen; hadaba waa maxay heshiis bulsho halkaas baan rabaa inaan sharaxo, heshiish bulsho waa hanaan dadka intii isku dal iyo deegaan ahi kuwada nooladan intii dawladnimadan casriga ahi aanay somalilada soo gaadhina waxa jiray heshiiyo bulsho oo dadkeenii hore ay kuywada macaamili jireen, dunida reer galbeedkana waa arin qarinigii 12aad si weyn ugu faaftay waana theory salka ku haysa political philosophy inta badana heshiiso bulsho ururada iyo xukuumadaha baa lagu dhisaa.

Balse dalnimadu dookh bulsho maaha, waa arin sharci oo salka ku haysa qawaaniin caalamiya oo lagu jaan gooyay goleyaal caalamiya sida united nation, maxakamadaha aduunka iyo ururada qaaraduhu ku bahoobaan.

Mudanayaal waxaad ogaataan haddii jiritaanka dalnimada iyo khariiradiisa dhuleed lagu saleyn lahaa heshiis bulsho dalalka geesku maanta dhul ahaan siday u qaabaysan yahiin umay qaabaysnaadeen; waayo waxa jira dadyow badan oo dalka ay maanta kamid yahiin aan ka mid ahaadeen hadii heshiis bulsho ama mid isir wax lagu wada yeelanayo, tusaale ahaan inanka Gaarisa ama Wajeer ku nool waxa uu ka mid noqon lahaa systemka dawladeed ee Soomaaliya, halka inanka Gaashamo iyo Harshin ku noolina uu kamid noqon lahaa systemka dawladnimo ee Somaliland; mudnayaal heshiisyada bulsho hadii xagal daac iyo saluug ku yimaado waxa ka aloosmi kara tabasho bulsho laakiin waxba kama badali karaan khariirada dal leeyahay, hadaanay marka horeba laba dal oo isu tagay oo kala noqonaya aanay ahayn.

Somaliland waa khariiradadeeda dhuleed waa mid aduunka ka jirta oo leh taariikh iyo tixraac sharci oo dalnimo balse hadii ay maanta noqotay mid isticmaar oo gaal cadi sameeyay, khariirada sabankaa ee Soomaaliya labadiii gobol ee lixdadnkii midoobay ka kooban yaa sameeyay yaa dee geeska ka dhigay yaa reserve area ka jaray yaa Gaarisa, Jigjiga kenya iyo Ethiopia ku kala daray; Somaliland hadaan la aqoonsanay macnaheedu maaha xaduudaheeda lama aqoonsana.

Sidaa darteed, Mudanayaal waynu qirsanahay in dhibaato ay dhacday oo ay laascaanood ka dhacday, dhibaatadaa dhacday iskay iman ee farsamo xumo ayay ku timiday laakiin maanta waxaynu u baahanay inaynu farsamo ahaan iyo quluub ahaan iyo midnimo ahaan iyo shacab ahaan sidaynu u wajihi lahayn maadama oo ay gacmo kale soo galeen u wajahno in badan baa dawladu ku celceliyeen dawladan aan iskeed isku maamulin ee muqdisho, waa dawlad afka ka dhisan waa dawlad social media ah ka dhisan markaa waxaynu inta badan ka difaac galaynaa arinteenu maaha inay difaac noqoto waa inayanu weerar galnaa weerarka waxaynu ku gali karnaa inaynu sameyno talo qaran,digtooni qaran, diyaar garaw qaran iyo dareen qaran.

Waxaan jecelahay inaan adkeeyo oo xoojiyo mudanayaashii soo jeediyay in magaalada la yidhaa Caynaba dhismaheeda, dhaqaalaheeda iyo maamulkeedaba la xoojiyo waxaan takiidinayaa oo aan adkeynayaa oo aan hoosta ka xariiqayaa mudnayaashii difaac qaran soo jeediyay.

Madaxweynaha qaranku runtii baaqii qarankuu soo saaray waa ku taageryaaa, doodan golahana waa taageerayaa een hadaad 24 saacadood TV ku hor yaala ka daawato dabaal macnaheedu maaha inaad adigu dabaashii baranayso; waxa la inooga baahan yahay

mudanayaal doodaha noocan ah in qaraar ka soo baxo, qaraar kaana xukuumadu ku dhaqanto intaas baa ku soo koobayaa.

**Md. Qaasim Aadan Saleeban** (14mnt, 21sec):- Bismilahi Raxmaani Raxiim, Asalaamu calaykum, ugu horayn waxaan rabaa inaan ka yar cudur daarto waxa malaha golaha doodii iigu danbaysay ee aan ka galaa waxay ahayd 22 August 2023 maalintaas oo aniga oo ka soo jeeday Gobolka Sool aan halkan ka soo jeedinayay talooyin dhaxal gal ah oo ku saabsan deegaankaasi laakiin la iga joojiyay hadalkiii maalintaa, waxaan codsanayaa maanta inaan tii yoo kale la iigu darine maadama oo aan deegaankiina ka soo jeedo xogta dhabta ah ee deegaankiina aan filayo cid iiga xog xogaalsani aanu jirin in la igu tixgaliyo hadalka iyo aragtida labadaba.

Xildhibaano badan oo gobolka sool ka soo jeeda ayaa golaha jooga waxaan filayaa xildhibaanka ugu hadalka badan ee gobolka ayaan ahay waxaan is weydiinayaa ma laascaanood baan ka jeclahay xildhibaanada kale mise Burco, Hargeysa iyo Boorame ayaa xanaha jira wax igu soo riixayaan oo lexe jeclo weyni iga haysaa sidaa awgeed ka fursan maayo maanta inaan doodayda maanta aan si waafiya u guto.

Waxaan soo dhaweynayaa aragtidii Xildhibaan Xirsi ee ahayd miisanaydii 2% ahayd ee gobolada bariga in aynu talo galyadeeda aynu wax ku yeelano waliba xildhibaanadii laga soo doortay deegankaasi ay wax ku yeeshaan, waxaad la socotiin miisanaydii ugu danbaysay ee golahani ka gudubta inaanu nidhi talada aanu wax ku yeelano oo la soo celiyay oo la diiday muhiimadeeduna waxay ahayd waar deegaanka ha lagu dhex jiro oo yaan laga dhex bixin waan xoojinayaa taa.

Waxa kale oo aan xoojinayaa xildhibaanadii soo jeediyay in arimaha ciidanka ee taagan haday noqon lahayd wasiirada ay khusayso oo ka badan hal wasiir iyo Taliyayasha ay khusayso oo kaban hal in iyagana golaha looga yeedho oo bal halkaa iyo arimahaa waxa laga damacsanayahay iyo qaabka aynu u wajahayno talo laga yeesho.

Soo jeedintii Xildhibaan Xuseen Ismaciil ee ahayd in golahu intuu bariga aado waliba ku dhex shaqayno waliba maalmo kooban baan soo jeedinayaa iyadana waan xoojinayaa.

Laabsaalax arintiiisii baan yar saxayaaye beelaha bariga ama deeganada bariga heshiish bulsho iskuma diidadana ee heshiis siyaasadeed weeye waxa ay isku diidanahay;

Dadku waa dad walaalo ah, waa dad ehel ah waa dad aan si aba ukala maarmin; intaa markaan araarta ka dhigto waxaan doonayaa inaan golaha iyo shacabka Somaliland ba u iftiimiyo inay ogaadan Sool inay Somaliland tahay, Somaliland-na ay Sool tahay, waa deegaankeenii waa dalkeenii.

Markay sidaa tahay waxa loo baahanyahay inaynu dib u raaco taariikha ah oo ogaano bal marxaladahii ay soo martay Sool iyo laascaanood ama Sool Bariba aan idhaado iyo Sanaag bari oo aanan garanayayn iyada laf ahaanteeda waxa looga reebayo markaa maanta mr hadiiba farogelin lagu hayoo labadiiba oo Soomaaliya ay labadiiba ku hayso.

Sool laascaanood amaba sool bari waxa jirtay xili ay gacanteena ka maqnayan oo aan cidiba maamulin waxa jirtay xili ay gacanta ugu jirtay maamulka Puntland ee Soomaaliya, mudadaas oo dhan kama aynaan maqnayn'e way in ku dhex jirnay way inoo xisaabsanayd, inaynu bulshada wacyi galin iyo fahansiin meeshii ay wax ku leeyahiin iyo dalkooda fahansiino, waxa ilaahay mahadiis ahayd doorashadii ugu danbaysay ee inagu aan ku soo baxnay in ay ka dhacaday gobolkaa deegaan walba oo kamid ah.

Haa tabasho siyaasadeed way jirtay xurgufina way iska jirtay dadkoo aan sifiican u wacyi gashanayni way jirtay, mar walba oo aanu wasaarada arimaha gudaha u tagno warkaygu wuxuu ahaa Laascaanood dawlad daadajin bay u baahan tahay ee dawladnimada aan gaadhsiino ayay ahayd oo aan ku xoojino waxa laga yaabaa haddii maalintaa la dhagaysan lahaa erayadaa in wax badan oo soo socday laga baaqsan lahaa oo anay dhaceen; waxa aad la socotiin laascaanood tabashadeedu way dhamanaysaa xiliga ay noqotaba waanay ku soo noqonaysaa xadkeedii iyo xuduudaheedii ay ogthay inay wax ku leedahay cid u dhaantana aysan jirin anaguna aanu maanta goloyaasha ku matalo ee aanu u dhex fadhino ; tusaale yar hadaan soo qaato dalka china aha waxa yidhi waxa aanu idinka tagaynaaa thaiwan 105 sano ayay ka maqantahay wali ma uusan weerarin isagoo awoodi kara hal maalin inay qabsadaan.

Waxa aan marlaba ka hortagaynaa oo aan diidanayn shalayna diidanayn, maantana diidanahay in deegaankaa colaad lagu wajaho, arinta sool waxaan ugu baaqaynaa nabad, waxaan ugu baaqaynaa in ay arimahooda xalistaan oo aanu wada hadal la furno waxaanu ku baaqaynaa in maxaabiista la sii daayo waa wax fool xun in maanta aynu maanta inagoo isku dal iyo deegaan ah aynu maxaabiis kala haysano oo aynu shuruudo ku xidhno ama ay maanta taariikh noqoto , waad la socoteen Israel iyo Palestine oo isdagaalaya ayaa dagaalkii oo socda maxaabiista is dhaafsanayay, waxaan ku baaqaynaa labada dhinacba inay ku dhiiradaan inay sii daayaan maxaabiista, waxaan ku baaqaynaa in jidka la furo wadahadalkiina soo noqdo,; waxaan soo dhaweynaynaa oo ku baaqaynaa gogosha nabada ee xukuumadu ku baaqday ee la dhigayay ceerigaabo waan xoojinaynaaa xukuumada waxaan ku baaqaynaa inaanay gogoshaa ku koobin deegaan qudh ah ee ay ku koobto Gobolada Sool barri iyo Sanaag barri iyo dedka dega dhamaantood ay qayb ka ahaadaan, waxaan ku baaqayaa dedka deeganadaa ka imanaya in la soo dhaweeyo fanaanad baa inoo timid Kiin Jaamac la yidhaahdo aad baa loo soo dhaweeyay oo waxa la maqlayay iyadoo masuuliyeenteeda ugu saraysaa leeyahayiin xafladay dhigtana waa ka qayb galaynaa, kiin shalay bay inoo timid beritana wey inaga tagaysaa.

Waxaan hayaa 50 wiil iyo hablood oo ka kala yimid Badhan, Buuhoodle, Taleex, Laascaanood, Xudun iyo Adhi cadeeye oo halkan jooga u yimid inay joogaan ama kamid ah dedka deegaanka oo aaminsan dalkooda iyo deegaankooda shaqo doon ah oo wasaarad kasta oo aan geeyaa ay ileedahay shaqo uma hayno kuwa aynu rabo inaynu ilaalinaa oo aynu soo dhawaynaa waa kuwaa, waxa ka daran wasaaradaha markii aan dib u dhex galo mid waliba dad bay shaaqalaysay waliba waxay u badan yahiin dad lagu badalay dadkii hore ayay u badan yahiin dadkaasi, hadii aynu baahanay inaynu sool shaa maqan u yeedhno inaynu laascaanood u yeedhno aynu kuwan soo dhaweyno oo aynu kuwan qacan qabano.

Soomaaliya mid baa odhan lahaa, Soomaaliya waxay ka kaluumaysanaysaa biyo dhooqo leh waxa ay gacanta kula jirtaa arimo aan munaasib ku ahayn, waxa aan la soconaa maamuladii ay samayasay ee iyada dhexdeeda ahaa maanta inay faro madhan ka joogto, waxa aan la soconaa Jubaland oo iyada ka tirsani halka ay maanta taagantahay, waxa aan ognahay Puntland oo iyada ka tirsani halka ay maanta taagantahay, nafiska siyaasadeed ee xukuumada Soomaaliya ha noqoto ta maanta jirta ama ha noqoto tii ka horaysay ay ka soo raadisaa laascaanood iyo badhan waxa hubaal ah inay ku fashilmayso waxa laga yaabaa nin damac siyaasadeed lahi inuu arko inuu halkaa kuraas ku helayo laakiin waxaan la wadaagayaa oo cadaynayaa, xildhibaan kasta oo ka soo baxa badhan iyo laascaanood u codayn maayo ninka maanta isleh wuu kuu codaynayaa ee faragelinta ku haya eeganadaa.

Waxaan Soomaaliya xasuusinaynaa 2007-dii waliba ragga maanta hogaankooda haya waxaan xasuusinaynaa 2007-dii markii xamar Ethiopia soo gashay way soo qaxeen oo wey soo yaaceen halkee ayay tageen ma Jawhar iyo Baydhabo ayay tageen, ma Dhuusomareeb iyo Marka ayay tageen maya Burco, Hargeysa iyo Boorama ayay tageen.

Waxay u yimaadeen wey garanayaan Nin rag ahina waa garanayaa Doqona loo sheegi maayo wixii ay halkaa ku yimaadeen tii yoo Kalena waa suurto gal inay mar labaad timaad; waar lama huraan waa caws jiilaal ayaan leenahay, ha iska qaribina meeshii aad ku soo cararayseen ee deegaanka idiin ahayd ee gabaadka idiin ahayd ee hadii aad reer tahiina aan anigu xildhibaanka idiin ahay ee idinku matalayay waxa aad luminaysaan wadahadaladii inoo socday ee ahayd inaynu kala gurano oo laba dal oo walaalo ah oo daris ah oo is garabsada noqono ayaad luminaysaan, waxaad abuuraysaan cadawtinimo iyo cadwaadad sal dheer oo aan dawo loo heli doonin ayaad abuuraysaan waxaad lumin doontaan isu socodkii dadka iyo ganacsiga oo aan hubo inay keeni doonto xanuun aydin xamli karaynin ayaad lumin doontaan.

Waxaad la kulmi doontaan dagaal dublimaasiyadeed maaha dagaal qori dagaal dublimaasiyadeed oo aydin mahadin oo xanuun badan baad la kulmi doontaan ee arimaha aad faraha kula jirtaan ee nin xil doonaya uu maanta gacanta kula jiro ee Soomaaliya

shacabkeeda iyo dalkeeda iyo deegaanadeeda iyo bulshadeeda wanaagsan aan danta u ahayn faraha kala baxa Somaliland iyada oo nabad ah dal madax banaana ah walaalihiin ah aad is garab sataan ayaa dantiinu ku jirtaa ta aanu doonayno inaanu idinkala shaqayno oo kawada shaqaynaana waa taa; xukuumad kasta oo ka soo hor jeesata taasna waxa noo balan ah inaanu ku qaadno dagaal dublamaasiyadeed oo aanay filaynin; madaxweyne xasan oo maanta xilka ku fadhiya maalmo ayaa u hadhay waxaad ku bushaaraysataa xilkaagii farogalintaa sool buu raacay iyo badhan ee nabad galyo, ka kuxigana waxaan leenahay inta la khalday ee kuwii hore khaldeen sax oo hagaaji ayaanu ku leenahay, reer Somaliland waxaan ugu baaqaynaa shacabka sool ee aanu ku matalano golayaasha waar ha la soo dhaweeyo, waar xilalka siiya waar cid walba ka hormariya, wasiirada marka aanu u tagno, waxa waliba aan aad uga xumahay inaan idhaahdo wasaaradaha marka aan tago anigoo xukuumada maanta jirta 12 sano ee ay jirtayba ka mid ahaa in marka aan tago wasaarada ah aanan DG aqoonin, Wasiirka aqoonin, Wasiir ku xigeenka aqoonin waa badidoode iyaguna aanay'se I aqoonin; waxaan filayaa dee ololahaa iyo halgankaa waar waanu u soo halganee 50-kaa Wiil iyo Gabdhood ee aan hayno xilalkoodiii diyaariya, hadii kale ha nagu kalifina inaanu Madaxweynaha u tagno oo nidhaahno arintaa go'aan ha laga gaadho.

Golaha waxaan ku xoojinayaa inay dareeranoo Caynaba tagaan maalmaha soo socdana fadhiistaan oo intaa hadhay ay qabtaan, aad iyo aad baa u mahadsantahiin.

**Md. Axmad Dayib Aadam (Ku-cadeeye)** *(6min, 02sec): -* Bismilaahi, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, waxaan taageersanahahy Mudanayaashii iga horeeyay doodda ee maanta iyo shalayba, gaar ahana ragii doodda tolmoon dhiibtay, waxaan xoojinayaa inaynu dagaalkaas qaawan ee qolada ku dhuumaalaysata Muqdisho ee ku fashilmay hawshii dadkoodu u igmaday oo doonaya fashilkooda inay Laascaanood ku qariyaan iyo Bariga Gobolka Sool.

Waxaan Gudoomiye iyo Mudanayaal anigu soo jeedinayaa saddex arrimood:-

- Arrinta Laascaanood waa arrin mudo jirtay, culayskeeda iyo meesaankeedana u baahan in foojignaanteeda iyo dedaalkeedaba la galo.
- In qaranimada iyo difaaceeda aynaan hayb u kala sheegan oo midnimo bulsho iyo dawladeed ku waajahno
- In amniga gudaha aad loo dhawro oo taas lafteeda aynu culayskeeda saarno, maxaa yeelay amniga guduhu difaaca xuduuda saamayn buu ku leeyahay, horeba dhaawacyada ina gaadhay waxa ina gaadhsiiyay waxay ahayd amniga gudaha oo dhaawac gaadhay oo saamaynteeda ku yeeshay, nabadgalyada darada amniga gudaha oo xoogaysataa saamaynteedu waxay keenta in xuduuda difaaceedu daciifo, marka waxaan soo jeedinayaa mudanayaasha soo jeediyay in hay'addaha amniga Goluhu u yeedho si xaalada jira wax looga waydiiyo, talooyina loo siiiyo.

Waxaan ku daryaa intaas oo aad in looga hadla muhiim tahay, inaanu wax iska sheeg sheega guduhu waxba soo kordhinayn, run ahaantii waxaan aad uga xumahay Mudanyaasha wali dhaliilaha la taagan ee Madxweynihi Xilka wareejiyay u haysta in aanu wali xilkii wareejiyay ee dhaliiisha leeyahay:-

Cad hadduu carrada kaaga dhaco amase ciidoobo
caqli nimuu ku waynyahay macuno calafka qaarkiiye
anigana caruuraha yaryari wayga caynkaase
aadan carab maxaan kala hadlaa caaqilbaan ahaye

Intii odaygaasi yidhi baan leeyahay nimankaas, waxaan leeyahay qaranimadaan u taaganahay, difaaceedaan u taaganahay, Madaxweynaha maanta jira waanu barbar taaganahay.

Xukuumada waxaan leeyahay waad ku mahadsan tihiin inkastoo baaqooda aan u arkayo xiligiisii inuu ka habsaamay, waxaan leeyahay Madaxweynahaa aad indhaha u furo Madaxwayne, run ahaantii warwer badan baa halkaa ka jirta, AHN Abwaan qaaliya baa wuxuu yidhi "***Dal-daloolka gurigayga iyo dadab la'aantiisa iyo dirirka soo hooray iyo dooda aan aalo. Markaan daacadaw eego inuu igu darooro iyo daad baan ka baqayaa"***

12kii April ayuu Raysal Wasaaraha dawladaas fashilan Laascaanood hindisay uu yimi, habeenkaas madaxtooyadeena xaflad wayn oo Madaxweynuhu Abwaanada iyo hal-abuurka ugu yeedhay baa ka jirtay, si aan dalka wax hawl ahi ka jirin, 15kii April buu ku noqday Villa Somaliya, 16kiina Madaxweynuhu Golaha Wasiirada shir degdeg ah buu isugu yeedhay, taasna warwar ban ka qabaa.

Baryahan Laascaanood iyadoo arrimahaas ka socdaan oo shirkii Golaha Wasiirada oo jirayna aan waxba lagu soo qaadin, sabtidii baa shir degdega la isugu yeedhay, markaa ma marka hore ayaan xaaladaha lala socon oo Madaxweynaha xili damba wax loo sheegaa, mise Madaxweynuhu arrimaha wuu hagranayaa?

Waxaan leeyahay, Mudane Madaxweyne waanu ku barbar taaganahay, arrimahaaga iyo arrimaha qaranku waa hawl ina wada saaran. Madaxweynaha iyo Xukuumadiisu waxaan leeyahay hore u socda dedaalkana badiya, anaguna waanu idin barbar taaganahay.

**Golaha waxaan u soo jeedinayaa inaynu qaraar adag oo beesha Caalamka iyo cid walba aynu ku gaadhsiinayno gardarada halkaas taala,** masuuliyad darada ka dhalata cida masuuliyadeeda qaadaysaana tahay cid gardarada ku soo qaaday inuu Goluhu soo saaray.

Waxaan aad u soo dhowaynayaa Mudanayaasha dooddihii difaaca qaranimada ka xanaaqi jiray ee maanta na soo gaadhay, maanta waanu idila barbar taaganahay, hadaad na soo gaadheena waad ku mahadsan tihiin. WSC.

**Md. Axmad Maxamed Maxamuud (Kaare)** ***(9min, 08sec): -*** *Shir*-gudoonka, Mudanayasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC.

Runtii doodda ilaa shalay inoo socotay waa dood aad iyo aad u muhiima, waa dood aynu xaalada iyo dareenka dadkeena kaga turjumayno, inkasto aan qabo inay wakhtigeedii ka soo habsaantay, hadana caano daatay dabadood la qabay inaynu wax ka nidhaahno waa muhiim.

Doodda ku saabsan xaalada Sool bari yo Sanaag xaalada nabadgalyada saddex qodob baan kaga hadlayaaa, gogoasha nabadgalyada gobolka sanaag Madaxweynuhu u fidiyay iyo nabadgalyada Hargaysa oo iyada lafteedu muddadii u dambaysay laga dayrinayay.

**Gobolka Sool** waxaynu ognahay sida Xildhibaanada intooda badan ay ka dhawaajiyeen in marxalada ay ku jirta aanay ahayn mid maanta ku bilaaaban tahay ee ay tahay mid soo socotay muddo saddex sanno ee u dambeeyay ah, waxaana xaaladaas abuuray oo ka dambeeyay dawladaas taagta daran ee Soomaaliya oo runtii aynu ognahay in aanu Kismaayo gaadhi Karin Madaxweynaha Somaaliya, aanu Baydhabo gaadhi Karin oo aanu Boosaaso gaadhi Karin.

Laakiin waxaan iswaydiinaynaa maxaa maanta inagoo ah dawlad 34 sannadood ah inaynu dawlad aan itaalkeeda sida u tilmaamayno ka cabano keenay. Waxaan aragtidayda qabaa in waxa keenay oo dawladaas itaalka daran jaaniskaas siiyay waa kala qaybsanaanteenii gudaha ee ku salaysnayd doonistii siyaasada.

Waxaan isleeyahay hadaynu maanta ka gudubno kala qaybsanaanta oo midnimo ku waajahno xaalada Gobolka Sool, isla markaana aynaan hagran, waxaynu ka gaadhi karnaa guul la taaban karo.

Waxa lagu celceliyay oo waliba Xildhibaanada muxaafidka ahi ku celceliyeen iyagoo ka shaki qaba xildhibaanada mucaaradka ah ee Kulmiye ugu horeeyo aynu midnimo ku waajahno Sool, waxaan idiin sheegaynaa oo bulshadeenana u sheegaynaa hadaanu nahay hadaanu nahay Xildhibaanada Mucaaradka ah ee Xisbiga Kulmiye shalay waxaanu difaacaynay qaranimada Jamhuuriyada Somaliland, maantana waxaanu difaacanayaa oo halki iyo meel adag ka sii taaganahay difaaca qaranimada Somaliland, waxaanu Xukuumada iyo Madaxweynahaba ku garab taaganahay, wax kasta oo nabadgalyada Gobolka Sool lagu soo celinayo, isla markaana xuduudaha dalkeena lagu sugayo diyaar baanuna u nahay.

Xukuumadu inay ku waajahdo Nabadgalyo waan soo jeedinaynaa oo shacabka reer Sool waa Somaliland, laakiin waa inay barbar socotaa u diyaargaraw difaac qaran, maanta halkay marayso waynu arkaynaa, in dawlado loo samaynayo ayaynu arkaynaa, in hub iyo saanad lagu soo ururinayo ayaynu arkaynaa, markaa waxaan leeyahay Xukuumadu waa inay u diyaargarawdaa difaaca qaranka, hadaanu nahay xisbiyada Mucaaradkana waanu garab taaganahay, intaas ayaan kaga baxayaa xaalada Gobolka Sool bari.

**Nabadgalyada Sanaag** waa mid aynu aad iyo aad ugu baahanay, waa mid aanu xukuumada ku garab taaganahay nabadgalyada iyo gogoshaas ay fidisay waana soo dhowaynaynaa, laakiin waxaynu u baanahay oo iyaduna taxadarkeeda in la siiyo u baahan nabadgalyadu waa mid noocee ah? Side bay noqonaysaa? Ma shacabkii reer Somaliland uun baa wadda hadlaya? Ma gobolaa loo wada hadlayaa? Ma Somaliland iyo states baynu u wada hadlaynaa?. Halkaas xukuumadu waa inay si cad bulshada ugu cadaysaa

gogoshaash nabadgalyo ee Gobolka Sanaag ka fidisay tu noocma ah bay noqonaysaa? Waxaana ku dardaarayaa inay noqoto mid lagu adkaynayo Jiritaanka iyo midniada Somaliland.

**Nabadgalyada Hargaysa,** runtii maalmihii u dambeeyay ama wiigagii u dambeeyay waxaynu ka war haynaa in xaalada degmooyinka magaalada Hargaysa warka ka soo baxyaa aanu ahayn war wanaagsan, waxaynu haynaa in hooyooyinkii maalinta hadhka cad ay ka canayaan in mobiladoodii iyo naftoodii u baqayaan. Sida uu sheegay Taliyaha Ciidanka Bilaysku muddadii koobnayd ee uu xilka hayay inay dhawr iyo soddon dil ay soo mareen, waxana isleeyahay arrintaas hadaan si degdeg ah wax looga qaban oo indho cad lagu eegin meel xun baynu gaadhaynaa, waxaynu maraynaa xaaladii Laascaanood ku bilaaban tahay 3 sanno ka hor ee dadkeeda mid loo dilayay ee la garan waayay cid dishay.

Waxaan soo jeedinayaa **halkan aynu ugu yeedhno Taliyaha Bilayska** oo fadhi xidhan warbixin inaga siinayo xaalada nabadgalyo ee Magaalada Hargaysa maxaa halkan gaadhsiiyay iyo maxaa laga qabanayaa oo qorshuhu yahay. Taasna halkaas baan kaga baxayaa.

Waxaan soo jeedinayaa **in Miisaaniyada Qaranka** oo xukuumadu gacanta ku hayso goleheenana iman doonta **loo jiheeyo inay noqoto miisaaniyad difaaca qaranka** loogu talagalo oo ciidankeena wixii saanad militari ee ay u baahan yihiin iyo dhiirigalin ay u baahan loogu tallagalo, miisaaniyadaasi waa  inay noqotaa miisaaniyad ka turjumaysa intaanay Golaha Wakiillada soo gaadhin difaaca qaranka, inagu ka Xildhibaano ahaan markay ina soo gaadho waajibaadkeenay ka gudan doonaa, waxaynu u jihayn doonaa inay noqoto miisaaniyad lagu difaacayo qaranka.

**Wada-hadalada Soomaaliya**, wada-hadalada Soomaaliya muddo dhawr iyo toban sanno ka hor ah bay bilaabmeen, waxaynu iswaydiinayna dhawr iyo tobankaas sanno qolada aynu wada hadlaynay ee Soomaaliya iyo inaga kee baa faa'iido ku qaba, maxaa dhibaato iyo khasaare inaga soo gaadhay? Waa inaynu dib u qiimayno.

Anigu aragtidayda, waxyaabaha Somaliladn inaynu qaranimadeena hanan kariwayno inaga gaadhsiiyay muddooyinkii u dambeeyay ay tahay wada-hadaladaas wali socda ee furan, sababtoo ah cid kasto wax-qabaaysa iyo cid kasta oo aynu qadiyadeena soo dhowaysa Soomaaliyada waxay hordhigaysa inay wada-hadalo inoo socdaan, taasina waa dabarka ugu wayn ee runtii inaynu qadiyadeena ka dhabayno hortaagan.

Waxaynu ognahay intaas oo wada hadal baa lagu galay dalal kala duwan oo aduunka ah, hal qodob oo ka fulay ma hayno, marka waxaan soo jeedinayaa oo ku taageerayaa xukuumada Madaxweynuhu wuxuu ku baaqay oo bulshada u sheegay inuu joojiyay wada-hadalkii Soomaaliya inaga dhexeeyay, ka gole ahaan waxaynu ku soo saarnay qaraar aynu arrintaas ku taageerayno wada-hadaladana ku joojinayno.

Waxaan qabaan, in inaga Golaha Wakiillada iyo Guurtidu ay arrintaas tallaabo degdega ka qaadaan, inagoo eegayna qodobada dastuurka ee fadhiyada wada-jirka ah inoo fasaxaya sida Qodobka 38aad farqadiisa 6aad xarafkiisa (J) wuxuu inoo fasaxayaa inaynu fadhi wada-jir ah yeelan karno labadeena Gole hadii nabadgalyada dalka wax iska badelaan, tan wada-hadaladuna waxaan isleeyahay waa arrin nabadgalyadeena

taabanaysa, markaa waxaan soo jeedinayaa in fadhigaas wada-jirka ah oo aynu ku joojinayno wada-hadaladii Somaliladn iyo Soomaliya in la isugu yeedo oo aynu ka hawl-galno.

Waxaan kaga baxayaa, waxaan taageerayaa baaqii Xuseen Ismaaciil ee ahaa inaynu Sool magaalada Caynaba aynu ku soo shaqayno maalin maalmaha kal-fadhigan furan yahay ka mid ah. Waad mahadsan tihiin. WSC.

**Md. Maxamuud Xayir Ducaale** *(4min, 08sec): -* Shir-gudoonka, Mudanayasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC.

Marka hore waxaan ku baaqayaa inaynu Ilaahay SWT ka baqno, Nabigeena Muxamad aynu ku Salino SALAWAATULAAHI CALAYHI SALAAM.

Marka labaad, Xildhibaano iyo Golewayne waxaad ogtihiin in wareerar lagu soo qaaday Somaliland, weerar qaawan oo gardaro ah oo lagu burburinayo nabadgalyada, degenaanshaha ka jira iyo horumarka ay gaadhay.

Nidaamka daciifka ah ee xamar ka jira wuxuu doonayaa inay la mid noqoto Somaliland nidaamkaas burbursan, maamulka Muqdisho ee fashilani wuxuu ku guulaystay inuu burburiyo qaybo ka mid ah Gobolada Somaliland sida bariga Sool iyo Sanaag bari.

Hadaba, hadii aan laga hortagin oo loo midoobin dhibkaas nidaamka Muqdisho bariga Somaliland kuma ekaan doonto goboladaas bari ee waxay saamayn doonta Somaliladn dhamaanteed.

Madaxweynaha qaranka waxaan ku bogaadinayaa oo uga mahadcelinayaa shaqadii waynayd ee uu qabtay sida qaramayntii ciidanka madaniga ah, aad iyo aad baana Madaxweynaha ugu amaanayaa arrinkaas.

Soo jeedin:-

- Waxaan taageeray Xildhibaanada qaran ee soo jeediyay in Madaxweynuhu qabto tallo-qaran oo ku saabsan arrinta ka jirta Gobolada Sool bari yo Sanaag bari, hadaan tallo qaran laga yeelan oo loo midoobin arrintaasi waa mid khatar ah.
- Waxaan taageerayaa Xildhibaanada ka hadlayay ilaa shalayto dhaqaalihii horumarineed ee Sool bari lagu dhisi jiray in loo soo weeceiyo Gobolka Saraar iyo inta ka hadhsan Gobolkaas.
- Waa in loo diyaargaroobaa Difaaca Qaranka muxaafid iyo mucaaradba oo gacmaha la isu qabsadaa.
- Waxaan soo jeedinayaa in la xoojiyo Ciidanka Qaranka.
- Waxaan taageerayaa qaraarkii Golaha Wakiillada hore uga soo baxay ee ahaa in la joojiyo wada-hadalada Soomaaliya ugu yaraan inta nidaamkani Soomaaliya hada ka jiro.
- Ma qabo anigu in Masuuliyiinta Qaranka hadeer cid looga yeedho, waayo arrintani waxay u baahan tahay tallo qaran oo dhamaan la isugu yimaado.

- Waxaan taageerayaa soo jeedinta Xildhibaanada qaarkood ee ah in Degmada Caynabo shaqadeena Golaha maalmaha qaarkood lagu soo qabto oo lagu soo shaqeeyo.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| -------------------------------------------------- | -------------------------------------- |